

80



JAMACATDA UMUMTA SOOMAALIYED
KOLLITYADA WAKBARAHADA LAFOOLE

COLLEGE OF EDUCATION
LIBRARY - AFGOI

**CODAYNTA
AF SOOMAALIGA**

M.X.XUSEEN.RAABI.

Handwritten text in a box: **4
2 5 2 2**

JAAMACADDA UMMADDA SOOMAALIYEED.

0000000

MAARSO 1977.

CODAYNTA

AF

SOOMAALIGA

MAXAMED XAAJI XUSEEN RAABI.

KULLIYADDA WAXBARASHADA EE

L A F O O L E .

**

*

*

*

*

*

*

*

*

*

*

*

*

*

*

GEYI TUSNADA BUUGGA - i -

IVRI SHIRKAD

TUSMADD		i-ii
I. ARAR.	-----	1
II. WAA MAXAY HADAL	-----	4
III. XUBNAHA HADALKA	-----	5
IV. QAYBAHA CODAANKA	-----	
,) <u>Codadka Taxan</u>	-----	12
i) <u>Shibbanayaasha</u>	-----	12
1. <u>Hakadayaasha</u>	-----	13
2. <u>Jaclayaasha</u>	-----	24
3. <u>Sabbeeyayaasha</u>	-----	29
4. <u>Sankabaxo</u>	-----	40
5. <u>Gudbanayaasha</u>	-----	44
6. <u>Gariirayaasha</u>	-----	47
7. <u>Doorsoonayaasha</u>	-----	49
8. <u>Shibbanayaasha Labanlaabna</u>	-----	55
9. <u>Koobid: Tilmaaridda</u> <u>Shibbanayaasha</u>	-----	59
ii) <u>Shaqallada</u>	-----	62
1. <u>Shaqallada gaagaaban</u>	-----	65
2. <u>Shaqallada dhaadheer</u>	-----	72
3. <u>Shaqallada Larnaan</u>	-----	83
4. <u>Koobid: Tilmaaridda</u> <u>Shaqallada</u>	-----	90

B) CODADKA SARE:

1. Xoojinta (stress)	93
2. Kicinta (pitch)	97
3. Toonka (tone)	100
4. Astaanaynta (juncture)	109

V. DOORSOONKA LAHAANED ((DIALECTAL VARIATION))

1. Shaal doorsoonay	116
2. Shibbane doorsoonay	117
3. Shibbane biiray	119
4. Laha allane oo is shibbane beddelay	120

VI. KAABAYAASHA (APPENDICES)

1. Kaabaha: Eraybixinta	121
2. Kaabaha: Xuruufta caalaniga ah	143
3. Kaabaha: Shaxaradda iyo Tusashaasha	144
4. Kaabaha: Tixraaca I	146
5. Kaabaha: Tixraaca II	149

I. HORRAYC

-ii-

Buuggan waxa uu si sargoyn (outline) ah u tilmaamayaa dhismaha codadka af Soomaaliga. Waxa weeye buug loo talo galay in uu gundhig u noqdo kobcinta codaynta (phonology) afka Soomaaliyeed. Waa buug dhammaan codadka afkeennu leeyahay si dulmar ah wax uga sheegaya. Waa buug ka dhashay duruustii ugu horraysay ee la siiyay arday Soomaaliyeed oo Afkeenna ka dhigatay Jaamacadda Ummadda.

Markii aan isu duwaayay duruusta ku jirta buuggan, waxa aan isku-deyay in aan si cilmi ah u qeexo: 1) Kooxaha codadka, 2) Meelaha ay ka soo-baxaan 3) Siyaabaha ay u soo baxaan, 4) Iyo rugaha ay ka fadhiisan karaan erayga. Intaas waxa weheliya qayb yar oo dulmaraysa is beddelka codeed ee ka dhasha doorsoonka lahiadeed (dialect variation).

Buuggan waxa uu codadka Afka Soomaaliyeed u kala qaybinayaa laba qaybood oo guud - codadka taxan (segmental sounds) iyo codadka sare (suprasegmental sounds). Labada qaybood ba waxa uu u sii kale sare qaybo hoose. Dhammaan wixii cod lagu magacaabi karo waxa ay ka mid noqonayaa labadaa qaybood mid ahaan.

Waxa jirta in aanuu cod yeelan karin macne, iyada oo eraygu cod keli ah ka kooban yahay mooyaan ee, sida "aa" oo xanuun ama taah muujinaysa, Markaas waxa codayntanu (nilmiga codadku) u gaar tahay dhismaha codadka. Dhismahaas oo ah mid aan dhib yarayn, u na baahan aragti aqooneed iyo dedaal dheeraad

Buuggani na waa mid dedaal keenay, aragto aqooneed na lala kaashaday. Ha se yeesho, ee waa mid loogu talo galay in laga murto oo wax lagu biiriyo wax na laga toosiyo. Sidaas daraadeed, waxa laga filayaa qofkii akhriya in uu wixii uu ka qabo i soo qaadhsiiyo ama ku qoro qoraal aan ogaan karo. Midaas waxa aan u leeyahay aqoonta adduunku maanta uu haysto, nin na waa uu bilaashay, nin na wax baa uu ku biiriyay. Dhismaha codadka ee afkeenna horaa loo bilaabay shisheeye iyo shokeeye ba, buuggan na in uu wax ku sii biiriyo ayaa loogu talo galay.

Waxa afeef muddan oo aan tilmaamayaa, in Meelaha qaarkoodi aanay sugnayn. Taas oo aan ula kacay sugnaan La'santooda. Midaasi na waxa ay tahay, markii aan rugaha codka aan tusmaynayay, Waxa aan coddaynta ka horraysa tusaalaha ku qeexay in ay codadka qaarkood saddex siyood oo kala duwan loogu dhawaaqo marka ay ugu horreeyaan, ugu dhexeeyaan, ama ugu dambeeyaan. Midaas waxa nurtideedu tahay in uu codka /b/ u qormo saddex siyood: /b^v/ oo horrayn ah, /b/ oo dhexaya ah, iyo /b/ oo dambayn ah. Waxa q waajib ah in marka codaynta (phonology) la doonayo in ay sugnaato in meel kasta uu codku galo, saddexdaa siyood had ba tii uu ku sugan yahay loo qoro. Ha se ahaato, ee waxa aan sidaa u qoray. Marka aan codka /b/ loo

Marka aan codka /b/ qeexayo oo kali ah. Marka aan qeexayo codka, ^{kala} haddii uu codka /b/ ku jiro erayyada aan tusaalo u qaatay, ruga kasta ha fadhiyo ee waxa aan u qoray isku si.

Waxa aan ula jeeday taas na in ay u hawl garaato ardayga kaqidda had ba codka la rabo in uu barto. Haddii codka la qeexayo iyo codadka kala ba sida kaqiiddu tahay loo qoro, tusaalaha ayaa noqonaya mid calaamado badan oo dhib ku ah ardaygu in uu wada kago. Markaas cod kasta saddexda rugood ee uu ka fadhiisto erayga, waxa ay kala cad yihiin oo kali ah; marka isaga laga hadlayo, si ay aqoonta laga baranayaa dhismaha codkaas ay dharaar u noqoto.

Waxa aan mahad weyn u naqayaa ardaydii aan u dhigay duruustan oo xiisihii ay ii dhegaysan jireen iyo su'aalihii iyo murankii xufnaa ee aragtida dheeraadka ah ee suura gelisay ^{go} qoridda buuggan ii fursay, iyo Faddax Maxamed Aadan u garaacidda buuggan aad ugu hawsbootay.

MAXAMED X. RAABI

MAARSO 10, 1977.

II. WAA MAXAY HADAL?

Haddii aan isku dayo in aan ka jawaabo su'aasha kor ku qoran, waxa laga ma maarmaan ah in aan isku dayo in aan baadho waxa hadalku ka samaysan yahay. Marka aan helo hadal waxa uu ka samaysan yahay ayaa aan sheegi karaa waxa hadal yahay. Qofka aan si cilmi ah u dhuuxin waxa uu odhan karaa "hadal waa hadal oo waa wax la yidhi". Jawaabtaasi na ma qancin karto nin ay tahay ujeedadiisu aqoon korodhsi. Aniga oo aan Jawaab kedis ah ka bixinayn su'aashan, waxa aan isku deyeyaa in aan baadi goobo waxa uu hadalku ka samaysmo, Dabeeto na waxa caddaan doonta Jawaabta.

Marka ugu horaysa, waxa aan wada og nahay in uu hadalku ka soo baxo afka. Qofka hadalka aqoon u leh iyo qofka aan aqoon u lahayni ba, muddaas waa og yihiin. Qofka hadalayaa waa og yahay oo xubna jidhkiisa ka mid ah ayaa hadalka hawshiisa qabta; ka dhegaysanayaa na waa og yahay oo waxa u muuqda dhaqdhaqaaqa xubnaha jidhka ee hadalka u qaybsan.

Marka labaad, haddii aan u fiirsado waqtiga aan hadlayo, waxa kale oo aan ogaan karaa, marka aan calaacasha gacantayd hor gudbo in ay dabayl qabaqabsani ka soo baxayso afka. Dabayshaas iyo xubnaha afka ee ay ka soo baxdo, markii ay culimada afafka (Linguistics) beadheen, waxa ay ogaadeen in uu hadal yahay hawo qulqulaysa (motion in stream of air). Culimadaasi, dabeeto, waxa ay u gondadegeen in ay raad qoobaan xubnaha jidhka ee hadalka

(speech organs) iyo hawada qulqulaysa. Waxa ay, kolkaas, ogaadeen saddexdan arrimood: 1) In ay jiraan xubno jidhka dadka ka mid ah oo u qaybsan hawsha hadalka. 2) In uu hadalku yahay hawo sabaynaysa. 3) In ay hawadaasi u qaybsanto codad-codad sare iyo codad taxan.

Culuunta halkan ku jirta, hadda ba, waxa ay u qaybsan tahay saddex qaybood oo guud: I. xubnaha jidhka ee hadalka (speech organs.)

II. Codadka taxan (segmental sounds)

III. Codadka sare (suprasegmental sounds).

Marka aan saddexdaas qaybood derisno ayaa aynu gaadhi karnaa aqoonta aynu i ugu baahan nahay, hadal waxa uu yahay, waxa uu ka samaysmo iyo weli ba sida uu u dhaqmo. Middaasi na waxa ay Jawaab buuxda inaga siinaysaa su'aasha aan ugu horayntii is weydiinay.

III. Xubnaha jidhka ee hadalka (speech organs)

Haddii uu yahay hadal wax jidhkeenna ka soo baxa, waa in ay jiraan xubno ku hawlani. Waxa la og yahay in ay jiraan xubno badan oo jidhkeenna ka mid ihiim ay qabtaan hawlo u gaar ah hadalka. Hawshaasi waa ay u kala qaybsan tahay xubnaha hadalka soo saara. Waxa ay hawsha hadalku u qaybsan tahay saddex:

1) bilaabid (initiation) 2) codsiin (phonation) 3) iyo joojin (articulation).

BILAABID: bilaabidda hawada waxa hawsheeda u gaar ah sanbabada oo ah meesha nuxurta hawada ku jirta ee jidhkeenu u baahan yahay ka saarta ee dhiiga ku darta, hawada nuxurtu ka baxdo na debedda u soo tuurta; sida calooshu uga siibto nuxurta ku jirta cuntada aynu cunno ay dabeeto dhiiga ugu darto. Hawada ka soo baxda iyo tan ku hoyata sanbabada, waxa ay wada maraan oo jid u ah sanka iyo afka. Sanka ayaa ah xubinta ugu haboon jidka hawada, bilaaba uu yahay afka xubinta ugu haboon calaatinta iyo dhadaminta. Markaas/hawada/uu hadalku ka samaysmaa ma aha hawada ku socota sanbabada ee waa ta ka soo baxda.

Sababta ugu weyn ee ay sidaas ku docdo na, waxa weeye in ay tahay hawo ku socota meel aan hawo ku jirin (vacuum). Marka hawadaasi, oo nuxur lihi, ay tagto sanbabada ayaa waxa soo waydaarta hawo aan nuxur lahayn (carbon dioxide) oo ah wixii ka hadhay hawadii ka horaysay. Hawadaas nuxurta la' ee ka soo baxaysa jidhka ayaa ah badiya. Hawada soo marta xubnaha hadlaka sameeya. Maxaa yeelay, bilaaba, hawada nuxurta lihi tahay mid hawl degdeg ah ku jirta joojinteedu waa ay dhib badan tahay, waa na laga kaaftoobi karayaa. Hawada aan nuxurta lahayn se waa, bilaaba aanay ku socon meel aan hawo ku jirin, hawl degdeg ah ku ma jirto, Joojinteedu na ma dhib badna.

Middaas waxa ay ^{kuu} muujinaysaa in aynu hadalno marka aynu ku

(exhalation) hadal ma iman karo inaga oo joojina hawada nuxurta leh moq yaane, taasuu na waa dhib.



Shaxanka 1, (a)

Marka ay hawadu ama neeftu marayso moqorka afka

(AF KA BIXID)

Shaxanka 1, (b)

Marka ay hawadu ama neeftu marayso moqorka sanku.

(SANKA BIXID)

Sanbabadu waxa weeye xubno aan lalman, ama dhaqdhaqaaqoodu talaabo dheerayn, ee waa xubno socod gaaban. Dhaqdhaqaaqa talaabada dheer ee aynu dareeuno marka aynu neefsanaynno, waxa dhaliya oo bilaaba bogga oo ah seedo maran, dhaqdhaqaaqoodu na talaabo dheer yahay.

Bogga waxa weeye hawshiisu in uu buufiyo hawada aan nuxurta lahayn, oo uu ka saaro sanbabada. Marka ay buufinta oo muddo gaaban qaadataa ay dhammaato ayaa boggu meeshiisa caadiga ah ku noqdaa. Noqodkaasi waxa uu soo muugaa hawadii nuxurta leh. Bogga hawshiisa joogtada ihi waa sidaa. Isaga ayaa na u qaybsan hawo xun ka saaridda iyo hawo wanaagsan soo gelinta sanbabada.

CODSIINTA (phonation) codsiinta hawada waxa u gaar ah xubin cunaha ku jirto. Xubintaas waxa ku dahaadhan kuraankurta cunaha ka muuqta cunaha ragga. Xubintaas waxa lagu magacaabi karaa sanduuqa (qalaanqulshada) codka. Qalaanqulshada waxa dhexdiisa kala qaybiya labad seedood ^{oo} garan oo marka aynu xoojinayno codgiigsama, marka aynaan xoojinaynin na debca. Labadaas seedood marka ay debecsan yihiin, waxa dhexdooda ka samaysma jid furan. Marka ay giigsan yihiin na, waxa xidhma jidka. Haddii hawo soo marto jidka oo furan codka samaysma codsiin na laha. Haddii se hawadu soo marto jidka oo xidhan, seedaha giigsan baa guriira ama ruxma. Debeeto gariirkaas ayaa codka xoojiya. Culimada afafku waxa ay ku magacaabaan codka ^{codlaawe} samaysma jidka oo furan c / l (voiceless sounds); codadka samaysma jidka oo xidhan ^{na codle} / (voiced sounds).



Shaxanka 2d (,) Marka seedaha qalaanqulshuhu ay debecsan yihiin (codlaawidda)

Shaxanka 2d (b) Marka seedaha qalaanqulshuha ay giisan yihiin (codlahaanta)

JOOJINTA: Joojinta ama dhiidhinta hawada maraysa rubnaha hadalka, waxa ay bilawdaa ku dhiwaagidda codadka (articulation of sounds) hawadaasi ha ahaato mid soo martay seedaha sanduuga codka oo furan ama isaga oo xidhan.

Joojinta hawada waxa u gaar ah xubno ku yaalla jidka hadalka oo u qaybsama laba kooxood oo koox aan dhaqaaqin iyo koox dhaqdhaqaaqda. Kooxda aan dhaqaaqin waxa weeye :


DEBINTA SARE, ilkaha sare, cirridka sare, dhanxanagga adag, dhanxanagga jilicsan iyo duunta, kooxda dhaqdhaqaaqda na waxa weeye: dibinta hoose, carrabka, hilibdalqaha iyo daanka hoose. Daanka iyo hilibdaquhu ka ma qabtaan hawl badan joojinta hawada ama sanaynta codadka. Haddii rubin taagan iyo rubin socotaa isku dawaadaan ama is qabsadaan, waxa samaysma cod ka mid ah codadka afka qofka hadlayaa uu lee yahay.

codadku

Hawada /ku ka samaysmaan waxa ay ku soo dhaxdaa saddex moqor oo afka aadamiya loo yahay. Saddexdaas moqor ha waxa weeye saddex meelood oo yaraysa ama dhinta xawliska hawada. Waxa na weeye:-
1) moqorka dhuunta (pharyngeal cavity), 2) moqorka afka (oral cavity), i 3) iyo moqorka sanka (Nasal cavity). Hawadu marka ay narayso saddexdaas moqor, waxa samaysna codadka. Codadka samaysna marka hawadu narayso sanka, waxa lagu magacaabaa sankabaxo (Nasal sounds). kuwa samaysna marka hawadu narayso afka na, waxa lagu magacaabaa afka baxo (oral sounds). Kuwa moqorka dhuunta ka samaysna na, waxa loo yaqaan codadka cunaha ama dhuunta (pharyngeal sounds).

Af kasta ba codadkiisu, inta badani, waxa ay ka samaysantaa moqorka afka. Codadka ka samaysna moqorka dhuunta iyo moqorka sanka waa ay is leegaan karaan waa na kala badnaan karaan. Af Soonaaligu waxa uu ka kooban yahay laba iyo konton cod (52 sounds). Laba iyo kontonkaas cod waxa ay u qaybsamaan laba kooxood: 1) Kooxda shibanayaasha iyo shaqallada ee sadarka ama laynka ku qoranta oo ah todoba iyo sodon cod (37), 2) iyo kooxda aan ahayn shibanayaal iyo shaqallo ee meelaha ay ka soo baxaani ay adag tahay si loo tilmaamo, oo ah 15 cod. Kooxda kowaad waxa aan ku magacaabayaan codadka taxan (segmental sounds), kooxda labaad na waxa aan ku magacaabayaa codadka sare (supersegmental sounds). Marka moqor ba inta cod ee ka soo baxda loo eego, waxa aynu ogaan karnaa 1) in: Lix iyo toban shibbane, shan iyo toban shaqal iyo shan iyo toban cod oo sare ay ka soo

baxaan moqorka afka, 2) in laba shibane ay ka soo baxaan
 moqorka sanka, 3) iyo in saddex shibane ay ka soo baxaan
 moqorka dhuunta.



1. moqorka afka.
2. moqorka sanka.
3. moqorka dhuunta (cunaha)
4. debinta sare.
5. ilkaha sare.
6. cirridka.
7. dhanxanagga adag.
8. dhanxanagga jilicsan.
9. debinta hoose.
10. ilkaha hoose.
11. caarada carrabka.
12. horaanta carrabka.
13. gadaasha *carrabka*
14. carrabka guntiisa.
15. hilibdalqaha.
16. cagagida.
17. qalaanqulshaha (sanduuqa codka)
18. seedaha qalaanqulshaha.

II CODDKA TAXAN
 IV QAYBAHAHADALTA
 III CODDADKA TAXAN

1) Coddadka Taxan.

Waxa ay coddadka taxani guud ahaan u qabsamaan shibbanayaasha iyo shaqallo. Labadaas qaybood ee guud waxa ay qayb waliba leedahay sumado u gaar ah oo lagu gartaa. Shibbanayaasha waxa lagu gartaa oo u sumad ah saddex ammuurood oo guud:

- 1) sida uu codku soo baxo,
- 2) meesha uu codku ku samayso
- 3) iyo fududaan ama cuslaan (voiclessness or voicedness)

Shaqallada na waxa lagaga soocaa shibbanayaasha oo u sumad ah laba ammuurood oo guud:

- 1) Meel iyo dhawaaqsameeye is na qabsadaan isu ma na dowaaadaan si aanuu u samayso cod leh sumad degaan ama degmo.
- 2) Shaqalku waxa weeye codka ugu muhimsan allanaynta (syllabication), oo allane (syllable) na samayso shaqal la'aantiis, shibbane keli ihi na ma noqdo allane, laakiin shaqal keli ihi waxa uu noqon karaa allane iyo eray ba.


SHIBANAYAASHA

Shibanayaasha marka loo eego saddexda ammuurood ee kor ku xusan waxa ay u qaybsamaan todoba kooxood.

Todobadaas kooxood mid waliba waxa ay leedahay sumad guud oo ay kaga duwan tahay kuwa kale. Waxa na ay kala yihiin:

1.1. HAKADAYAASHU: Waa kuwa samaysma, marka ay is qabsadaan meel iyo dhawaaq sameeye. Marka ay taasi dhacdo, waxa xidhma neeftii soo bixi lahayd. Kolka labada meelood ee is qabsaday la kala qaado, na, waxa soo booda oo baf tidhaahda neeftii xabisantay. Markaas ^{ku} clinada afafka waxa ay magacaabaan codadkan laba siyood. Marka laga eego xagga neefta xidhmaysa, waxa la odhan karaa kooxdan codadka hakada ama hakadayaal (stops). Waxa na loo badan yahay iyada. Marka laga eego xagga neefta soo booda ee baf tidhaahda, waxa la odhan karaa kooxdan codadka bafleeya-garkayaasha (plosives). Codadka dhaqaan^{ka} lihi waa ay ku badan yihiin af Soomaaliga, Waxa na ay dhan yihiin todoba: /b/, /t/, /d/, /k/, /g/, /q/ iyo

/r/.



Shaxanka 4d: meesha uu ka unkamo shibbane /b/.

1. /b/ HAKADE - LABADEBNOON CODE

Codkaani waxa uu samaysmaa, marka ay llaba debnood xoog isu qabsadaan. Haddii uu erayga ugu horeeyo, waxa labada debnodd ka soo booda hawo xoogleh. Marka uu erayga ugu dambeeyo ee, wax dabayl ihi debnaha ka ma soo baxaan, ee waa uu "reebnaa" sida sukuunta af carbeedka /b/. Marka uu uga dhaxeeyo erayga na, waxa uu u soo baxaa si hawo leh, laakiin aan u xoog badnayn sida marka uu ugu horeeyo. Waxa isku carbisaa dhihidooda erayyada hoose ku qoran, ee qeexaya saddexda siyood ee codka loogu dhawaaqo:-

SHIBBANE

HORRAAN /b/	DHAXAYN /b/	DAMBAYA /b/
bir /b ^r /	xabad /x ^a bad/	xab /x ^a b/
boq /b ^o q/	sibir /s ⁱ bir/	dub /d ^u b/
baal /b ^a l/	guban /g ^u ban/	ib /i ^b /
badar /b ^a dar/	sabag /s ^a bag/	ceeb /c ^e e:b/
bogor /b ^o qor/	durbaan /d ^u rba:n/	lab /l ^a b/
bilic /b ⁱ lic/	ubad /u ^b ad/	waab /w ^a :b/
beer /b ^e er/		saab /s ^a :b/
bari /b ^a ri/	kabaal /k ^a ba:l/	
baraf /b ^a raf/	dhoobey /d ^h o:bei/	leeb /l ^e :b/
baydh /b ^a id/	dabaal /d ^a ba:l/	malab /m ^a lab/
bulsho /b ^u lsh/	dabayl /d ^a ba:l/	edeb /e ^d eb/

SULBI

/b/	HORRAAN /b/	DHAXAYN /b/	DAMBAYN /b/
		dabayl /dabail/	dhidib /idib/
beel /beil/	gunbui /gumburi/	galab /qalab/	
	gobol /gobol/	xuub /xuib/	
biila /biila/	habsol /habsol/	zobol /zobol/	
buuri /bu:r/		udub /udub/	
	abti /abti/	salab /salab/	
ba-kin /barkin/	seben /seben/		
bataax /bata:h/	habar /habar/	garab /garab/	
bayr /vair/		alaab /ala:b/	
badhar /bad:h/	libaax /liba:h/	jilib /jilib/	
		dalab /dalab/	



Shaxanka 5d: neesha ay ka unkamaan (t) iyo (d).

2. /t/

HAKADE CAAR-CIRRID CODLAWE.

Waxa uu codkani samaysmaa marka caarada caarabku iyo cirridka sare ay is qabsadaan, seedaha ku yaalla qaalanqulsaha ama/hadalku na ma gilisamaan. Sidaas ayaa uu ku noqday codlaawe. Saddexda siyood ee loogu dhawaaqo codka /b/ ayaa loogu dhawaaqaa: /t̥/, /t/ iyo /t̄/. Mar uu ugu danbeeyo afkeenna ma jiro. Waxa aad isku claylisaa dhihidda erayyadan:

SHIBBANE

2	t	/t/	HORRAAN /t̥/	DHAXAYN	/t/	DAMBAYN /t̄/
		Timir	/timir/	rati	/rati/	-
		tiir	/tiir:/	affi	/affi/	-
		tahar	/tahar/	iftiin	/iftiin/	-
		taallo	/ta:llo/	itaal	/itaal/	-
		tebin	/tebin/	abti	/abti/	-
		teeb	/teeb/	ibtilo	/ibtilo/	-
		tusmo	/tusmo/			-
		tuulo	/tu:lo/	mufti	/mufti/	-
		toban	/toban/	shaati	/sha:ti/	-
		tooman	/to:man/	shati	/sha:ti/	-
		tusaale	/tusa:l/	kabtale	/kabatole/	-
		talaabo	/tala:bo/			-
		tub	/tub/	intii	/intii:/	-
		taamar	/taamar/	jirtey	/jirtey:/	-

SITIRBANE

t /t/	HORRAAN /t/	DHAXAYN /t/	DAMBAYN /t/
taah	/ṭa:h/	xigto	/x̣igto/
tayda	/ṭaida/	dhito	/ḍhito/
tuur	/ṭuur/	jiitay	/j̣i:tai/
taws	/ṭaws/	dhigtaa	/ḍgta:/

d
3. /a/

HAKADE CAARO-CIRRID CODLE

Waxa uu codkan la ^{degaan} baxaan yahay codka /t/. Taas macnaheedu waxa weeye in ay meel ka soo wada baxaan ama ka samaysmaan. Waxa keli ah ee ay ku kala duwan yihiin, waxa weeye /d/ cod baa ay leedahay, /t/ na cod baa aanay lahayn. Sidaas ayaa codka /d/ loogu magacaabay codle, codka /t/ na loogu magacaabay codlaawe. Codka /t/ seedaha suuduuga hadalku na giiisnaan. /d/ se seedaha suuduuga hadalka ayaa giiisna.

Waxa jirta oo kale in uu codka /d/ emayyada afkeenna uu ugu horayn karo /ḍ/, ugu dhexayn karo /ḍ/, ugu na dambayn karo /ḍ/. Waxa aad isku carbicaa dhibiida emayyadan:

SHIBBANE

	HORRAAN /d/	DHALAYN /d/	DAMBAYN /d/
dibi	/ḍibi/	edeb /edeb/	ummad/ummād/
dumar	/ḍumar/	udug /udug/	xabad/xabād/
duul	/ḍa:l/	oday /odal/	bad/bad̄/
dacwad	/ḍa:ʁwad/	adeer /aḍeer/	daad/daad̄/
deris	/ḍeris/	bade:l /bade:l/	colaad/cola:d̄/
doofaar	/ḍo:fa:ʁ/r/	midig /midig/	cad/xa:d̄/
digir	/ḍigir/	mudaxi /mudax̄/	kayd/kaid̄/
dal	/ḍal/	hadal /hadal/	shiid/ʃi:d̄/
deeqa	/ḍe:qa/	arday /ardai/	ood/a:d̄/
dameer	/ḍame:r/	gadaal /gada:l/	fiid/ʃi:d̄/
deyn	/ḍein/	edeg /edeg/	mood/mo:d̄/
durbaan	/ḍurba:n/		feyd/feid̄/
daaf	/ḍa:f/	sidig /sidig/	mayd/maid̄/
dogob	/ḍogob/		
duhur	/ḍuhur/	cadaw /ʁadau/	
dacwo	/ḍa:ʁawo/	sidi /sidi:/	caad/ʁaid̄/
deelqaaf	/ḍe:lqa:f/		
dayr	/ḍair/		
hadimo		hadimo /hadimo/	saliid/sali:d̄/
deelqaaf	/ḍe:lqa:f/	jidiin /jidi:n/	haad/ha:d̄/
dayr	/ḍair/	fidi /fidi/	ciid/ʃi:d̄/
dawlad	/ḍawlad/		



(k) (g)

Shaxanka 6d: Meesha ay ka unkamaan /k/ iyo /g/.

4. /k/ k HAKADE DAMBAYN -DHAXANAGGIILIASAN CODLAWE ^{a Jilicsan}

Marka uu samaysanyo codkani, waxa xoog isu qabsada carrabka xaggiisa dambe iyo dhanxanagjilicsan ee hilibdalquhu ku yaallo xaggiisa dambe. Horaanta erayga waxa uu leeyahay codkani neef xoog u soo baxda ~~/k/~~ dambayntiisa na afkeennu na laha /k/. Marka uu ugu dhexeeyo erayga /k/ waa neel dhexaad. Taas macnaheed waxa weeyo in aanay neef xoog lihi na soo bixin, neef la'aanin na aanay jirin. Waxa aad kala qeexda dhihidda erayyadan.

SHIBBANE

	HORRAAN /k/	DHAXAYN /k/	DHAMAYN /k/
4. k /k/	koor /ko:r/	hakad	/hakad/
	kaliil /kali:l/	lakab	/lakab/
	koley /kohei/	maakub	/ma:kub/
	kibir /kibir/	shaki	/faki/
	kitaab /kita:b/	dukaan	/duka:n/
	kelli /kelli/	rakaab	/raka:b/
	kiishad /ki:ʃad/	tuki	/tuki/
	kayd /kaid/	xakab	/hakab/
	koofiyad /ko:fijad/	takar	/takar/
	koonfur /ko:nfur/	jikaar	/ʃika:r/

5. /g/ KAKADE DAMBAYN-DHANXANAGGA JILICSAN CODLE.

Waxa codkani la mataan yahay codka /k/ oo iska meel ayaa ay ka soo baxaan. /k/ waa codlaawe, /g/ na waa codle. Codka /g/ waa uu ugu horayn kawaa, ugu dhexayn kafaa, ugu na danbayn karaa erayyada afkeenna. Marka uu ugu horeeyo, waxa soo baxda dabayl xoog leh /g/. Marka uu ugu danbeeyo se waa uu hadkadaa oo dabayli soo na baxdo /g/. Ugu dhaxaynta na dabayl xoog leh na na laha, na na hakado /g/. Saddexdaa rugood ee uu fadhiisto codkani, waxa ay ku qeexan iyihiin erayyadan hoos ku qoran ee si haboon u ugu dhawaaq.

5. g /g/

HORRAAN

19/


DHEXAYN

19/

DAMBEYN

19/

geed/geid/	dhego/dogo/	edeg/edeḡ/
gedo/gedo/	ugaadh/uga:q/	adayg//ada:ḡ/
gabadh/gabad/	dugsi/dugsi/	laag/la:ḡ/
goosan/go:san/	dogob/dogob/	ileg/leg/
gurxan/gurhan/	ugub/ugub/	ilig/ilig/
geenyo/ge:njo/	degdeg/degdeg/	buug/bu:ḡ/
galab/galab/	dagaal/dag:l/	bug/buḡ/
gumburi/gumburi/	tegid/tegid/	subag/subaḡ/
gadaal/gada:l/	xigto/xigto/	midig/midiḡ/
guur/gu:r/	bugto/bugto/	udug/uduḡ/



(g)

Shaxanka 7d: Meesha uu ka unka /q/.

6. o /q/ HAKADE DAMAYN -DALQO CODLE.

Codkan laba meelood baa uu Af Soomaaliga ka soo baxaa. Mar waxa uu ka samaysmaa carrabka dabadiisa ^{yo} ~~dhaxanagga~~ jilicsan xaggiisa dambe ee uu hilibdalquhu ku yaal. Marka kale na waxa uu ka samaysma carrabka dabadiisa iyo gidaarka ka dambeeye cagagida ee loo yaqaan dalqada. Waxa labada loo badan yahay ka dambe. Isaga ayaa na aynu u baranaynaa. Marka uu erayga ugu horeeyo, waxa uu leeyahay dabayl xoog leh /q/. Marka uu ugu dambeeyo erayga se, na laba dabayl ee was reeban yahay /q/. Marka uu ku jiro dhexda na waxa uu dhihid ahaan u dhexeeyaa. Marka uu dabayl lee yahay iyo marka uu reeban yahay /q/. Waxa aad u fiirsataa dhihidda erayyadan:

SHIBBANE

q	/q/	HORRAAN	/q/	DHAXAYN	/q/	DAMBAY	/q/
		qaali	/qa:li/	aqal	/aqal/	halaq	/halaq/
		Qurux	/qurux/	maqal	/maqal/	walaq	/wala:q/
		qaddar	/qaddar/	waqti	/waqti/	maraq	/maraq/
		qawl	/qawl/	maqas	/maqas/	faraq	/farq/
		qayb	/qayb/	ciqaab	/ciqaab/	marraq	/marra:q/
		qalle	/qalle/	caqli	/caqli/	dabaq	/dabaq/
		qabbaan	/qabba:n/	shaqul	/shaqul/	sanduuq	/sandu:q/
		qoys	/qois/	cuqaal	/cuqa:l/	sidiq	/sibiq/
		qalab	/qalab/	figi	/figi/	dhiriq	/dhiriq/
		quud	/qu:d/	noqod	/noqod/	musuq	/musuq/



Shaxanka 8d. Meesha uu ka unkano /2/

7.9/2/

HAKADE BILAWGA DHUUNTA CODLAWE.


Waxa codkani samaysnaa, marka ay is qabsadaan seedaha sunduuqa hadalka. Marka codkani samaysmayo na, waxa geli ahaan joogsta neefta ~~sambabada~~ ka soo baxaysa. Marka seeduhu is qabsadaan ee codkan samaysmayo, seeduhu na gariiraan ee ^{waa ay} hakaadaan. Marka seeduhu is dhowaadaan ee giisanaan ayaa neefta soo dhexmaraysaa gariir (vibration) siisaa. Is qabsigaas baa na cod la'aanta kaanta.

Maraa

Codkanini ugu na horayn kara erayyada afkeenna. Waxa yeelay, meesha uu geli lahaa, waxa fadhiista shaqalka gaaban ee /a/. Marka uu ugu darbeeyo waa reeban /2/, marka uu ugu dhoreeyo na dabayl yar baa uu lee yahay, /2/, marka na uu u dhoxo laba shaqal: Tusaalaha dhugo.

7. 9 /R/	HORRAAN	DHAXAYN /R/	DHAMAYN /R/
		go'aan /goʁa:n/	gu' /guʁ/
		la'aan /laʁa:n/	da' /daʁ/
		faa'aido /fa:ʁi:do/	go' /goʁ/
			la' /laʁ/

2. JACLAYAASHU Waxa ay run ahaan ka mid yihiin hakadayaasha, Sababta oo ah in ay is qabsadaan meel iyo dhawaaqsameeye, sida hakadayaasha, neeftu na waa ay joogsataa. Waxa se ay kaga duwan yihiin, waa amuur keli ah. Amuurtaasi na waxa ay tahay, iyada oo xoog loo soo dhifto dhawaaqsameeyaha, si ay neeftu, iyada oo xoog leh, u samqadho oo jac u tindhaahdo. Waxa na ka mid ah Af Soomaaliga, laba cod oo gudh ah. Labada cod waxa ay kala yihiin: /d/ iyo /tʃ/




Shaxanka 9d. Meesha uu ka unkamo /d/

8. /d/ JACLE CAARO - CIRRID CODLE

Codkani waxa uu ka samaysmaa marka ay is qabsadaan caarada carrabka oo deri leh iyo cirridka dabadiisa ama dhankanagga **carrabka** adag hortiisa. Derida /r/ rabka iyo meesha uu qabsaday oo godan dhexdooda ayaa waxa ku xabisna hawo. Marka carrabka laga soo **xabisnayd** dhufsto ayaa hawadii, xab /m/ qaraxdaa. Qaraxaas ayaa abuura jacda codka lagu magacaabay. Seedaha sunduuqa hadalku na waa ay giisamaan oo neefta ka soo baxaysa sanbabku na kaga gariirisaa, dabeed na codkani codle ayaa uu noqdaa.

Marka uu ugu horeeyo, ugu dambeeyo iyo marka uu ugu dhaxeeyo ba codkani, waxa uu leeyahay dabayl xoog leh /d/. Waxa aad dhuuxdaa dhihidda erayyadan:

8.dh / /	HORRAAN /d/	DHAXAYN /d/	DAMBAYN /d/
	dhalo/dalo/	fandhaal/fanda:l/	flaadh/fla:d/
	dhilmaanyo/dilma:njo/	biidhi/bi:di/	baydh/baid/
	dhac/dac/	siidhi/si:di/	xaydh/haid/
	dhicis/dicis/	bidhiq/bidiq/	jiidh/tji:d/
	dhiig/di:g/	qaadhaan/qa:da:n/	sanqadh/sanqadh/
	dhib/dib/	gudhanjo/quda:njo/	faladh/fallad/
	dhawaag/dawa:q/	candhuuf/candu:fo/	xiidh/hid/
	dhif/dif/	cidhib/cidib/	feedh/fe:d/
	dhurwaa/du:wa:/	bidhaan/bida:n/	xaadh/ha:d/
	dhuxul/duxul/	sidhin/sidin/	cabudh/cabud/




Shaxanka 10d. Meesha uu ka unkamo / t /

9. / t / / JACLE HORAYN - DHANXANGGA ADAG CODLE.

Waxa codkani ka soo baxaa neesha ay isugu taagaan carrabka xaggiisa hore iyo dhanxanagga adagi. Waxa kale oo aad moodaa sidaa qoraalkiisa xuruufta caalinigu tusayso in uu yahay / t / fudud iyo sh // / oo isku biiray. Carrabka horaantiisa ayaa xoog looga soo dhiftaa dhanxanagga. Dufashadaasi na waxa ay keentaa neefta oo qaracda oo jac tidaahda. Saddexda goobood ee uu fadhiisto na, codkan waxa uu yeeshaa hawo o xoog leh / t / . Waxa aad si fiican ugu fiirsataa soo bixitaankiis, marka aad ku dhawaaqayso erayyadan:

9. j /4/	HORRAAN /4/	DHAXAYN /4/	DAMBAYN /4/
	jago/tfaho/	xijaab/ itfa:b/	xaji/hatf/
	jago/tfago/	iijaar/ltfa:r/	taaj/ta:tf/
	jawaan/tfawa:n/	ajuuro/atfu:ro/	tooj/to:tf/
	jilib/tfillib/	xujey/ utfei/	
	jinac/tfina /	dubjir/dibtfir/	
	jahli/tfahli/	geeljire/ge:ltfir/	
	Jaamac/tfa:ma /	wajeer/watfeir/	
	jaalle/tfa:ll /	wefi/wetfi/	
	janno/tfanno/	cajeb/ atfeb/	
	jilayc/tfilai /	gujis/gutfis/	

3. SABEYYAYNASHA: Waxa u sumad ah codkan guud ahaan, neefta oo si cidhiidhi ah u marta jidka hadalka. Cidhiidhigaas ayaa dhaliya gariir ama guux u gooni ah codadkan. Waxa ay taasi na dhacdaa, marka ay isku dhowadaan meel iyo dhawaaq sameeye. Codadka ku jira afkeenna ee gariirka ama guuxa yeesha, waxa ay yihiin todoba: /f/, /s/, /ʃ/, /x/, /k/, /ʒ/ iyo /h/. Dhammaantood codadkaas waxa ay ku soo samaysmaan moqorro kala duwan iyo meelo iyo dhawaaq - sameeye kala gedisan.




10. /f/ SABEEYE DEBIN - ILKO CODLAawe.

Saniaysma

Waxa uu codkani marka ay debinkhoose ilkaha sare ku dhawaato; oo neefta na aad maqashid guuxeeda marka ay kala dhex marayso debinta iyo ilkaha dhexdood. Marka codkan lagu dhawaaqayo, ^{sanduugu} seedahaur/uuq waa ay debexsan yihiin oo ma guuxaan. ^{Meel} Kasta erayga ha kaga jiro, ee codkani isku si baa loo maqalaa marka uu soo baxayo /f/. Waxa aad u fiirsataa ~~dhididdada~~ erayyadan uu ku jiro:-

SHIBBANE.

10. f /f/	HORRAAN /f/	DHEXAYN /f/	DAMBAYN /f/
	fad/fad/	afar/afar/	laf/laf/
	fal/fal/	ufo/ufo/	huf/huf/
	feedh/fe:d/	afeef/afe:f/	naf/naf/
	fur/fur/	gufayn/gufain/	jaf/tjaf/
	far/far	lafo/lafo/	rif/rif/
	foori/forri/	dhufaan/dufa:n/	saf/saf/
	fiiq/fi:q/	kaafin/ka:fir/	saaf/sa:f/
	fiin/fi:n/	kafan/kafan/	dhcof/do:f/
	faq/faq/	lufan/lufan/	hiif/hi:f/
	faallo/fa:llo/	qalfoof/qalfo:f/	neef/ne:f/



(s)

Shaxanka 12: Meesha uu ka unkamo / s /

11. /s/ SABEEYE CAARO-CIRRID CODLAWE

C.k

Codkani waxa uu samaysmaa marka ay isku dhowadaan caarada carrabka iyo cirridka sare. Waxa sida dabaysha u guuxda neefta dhex maraysa jidka kooban ee u dhexaysma carrabka iyo cirridka. Waxa kale no debecsama seedaha sanduuga codka; taas ayaa na ugu wacan codlaawida. Rugaha codkani dego oo dhan, codkan waa uu u dhawaaqmaa isku si /s/. Waxa aad isku laylidaa u na fiirsataa dhihidda codkan oo ku jira erayyadan:-

SHIBBANE

11. S /s/	HORRAAN /s/	DHEXAYN /s/	DAMBAYN /s/
	sal/sal/	asal/asal/	kiis/ki:s/
	sii/si:/	naso/naso/	miis/mi:s/
	sun/sun/	miisaan/mi:sa:n/	niis/ni:s/
	saaqa/sa:qa/	lisin/lisin/	nus/nus/
	sahay/sahai/	isir/istr/	mus/mus/
	sonkor/sonkor/	basar/basar/	hoos/ho:s/
	solay/solai/	xasan/hasan/	boos/bo:s/
	socod/so:od/	fasal/fasal/	mas/mas/
	sakal/sakal/	kursi/kursi/	xas/has/
	sibraar/sibra:r/	dersin/dersin/	dhosoq/dosoq/



(S)


Shaxanka 13d: Meesha uu ka unkamo / s /

12. /S/ SABEYE HORAYN - DHANXANAGGA CODLAWE.

Marka uu samaysmayo codkani, waxa isku dhowaada carrabka xaggiisa hore iyo dhanxangga adag. Seedaha sanduqa codku na waa ay dibbeecsan yihiin, oo taas ayaa keenta cod la'aanta uu cod la'aan yahay. Meel kasta erayga ha kaga jiro, ee waa isku mid ku dhawaaqiddiiso. Waxa aad u fiirsataa dhihiddiisa meesha uu kaga jiro erayyadan.

SHIBBANE.

12.SH./S/.	HORRAAN /S/	DHEXAYN /S/	DAMBAYN /S/
	shir/ʃir/	buraashad/bura:ʃad/	rash/raʃ/
	shaah/ʃa:h/	buushe/bu:ʃe/	qoosh/qa:ʃ/
	shar/ʃar/	ashuun/aʃu:n/	xash/xaʃ/
	sheed/ʃe:d/	qashin/qaʃin/	faash/fa:ʃ/
	sheeg/ʃe:g/	bulsho/bulʃo/	boosh/bo:ʃ/
	shiiq/ʃi:q/	xuunsho/xu:ʃo/	shiish/i:ʃ/
	shuqul/ʃuqul/	kooshin/ko:ʃin/	furaash/fura:ʃ/
	shay/ʃai/	fooshad/fo:ʃad/	qash/qaʃ/
	shaf/ʃaf/	xaashad/xa:ʃad/	wiish/wi:ʃ/
	shid/ʃid/	raashin/ra:ʃin/	kiish/ki:ʃ/



(X)

Shaxanka 14d: Meesha uu ka unkamo / X /.

13. /X/ SABEYE DAMBAYN - DHANXANAG JILICSAN CODLAWE.

Meesha uu codkani ka samaysmaa, waxa weeye meesha ay isku dhowaadaan carrabka xaggiisa dambe iyo dhanxanagga jilicsan xaggiisa dambe ee uu ka yaallo hilibdalquhu. Neefta ka soo baxda jidka ka samaysna isku dhowaanshaha ayaa siisa sabaynta lagu magacaabo codkani iyo kuwa la koox ah ba. Seedaha sanduuga codku waa ay bedecsan yihiin, oo waxa ay siisaa cod la'aanta. Rug kasta oo uu fadhiisto codkani isku si ayaa loo yidhaahdaa /X/, sida erayyadan.

SHIBBANE

13.KH./x/ HORRAAN /x/ DHEXAYN /x/ DAMBAYN /x/

khuukh/xu:x/ akhri/axri/ bookh/bo:x/

khuuro/xu:ri/ aakhriro/a:xiro/ tookh/to:x/

khariif/xari:f/ aakhir/g:dir/ tookh/tfo:x/

khasaare/xasa:re/ maakhir/ma:xir/ khuukh/ku:x/

kharaash/xaraj/ dakhar/daxar/ obokh/obex/


kharaat/xara:b/ dhaxhtar/daxtar/

khaanad/xa:nad/ nakhli/naxli/ dawakh/dawax/

khad/xad/ barkhad/barxad/ daakh/do:x/

khadiija/xadi:ja/ makhrib/maxrib/ shuukh/ju:x/

khali/xali/ bukhuur/buxu:r/ mashiikh/mafisx/



()

14. /s/ SABEEYE DALQO CODLE.

Waxa codkani samaysmaa, marka dalqada hoose ururto, ee aanay is qabsan, Markaas ayaa ay neeftu ka soo baxdaa iyada oo maqalka cabaad leh. Marka codkan la odhanayo, seedaha sanduuqa hadalku waa ay glisamaan, oo taas ayaa codka dheeraadka aha u yeesha. Meel kasta erayga ha kaga jiro, ee isku si baa loo yidhaahdaa //s//. Waxa aad isku laylisaa erayyadan uu ku jiro.

SHIBBANE.


14. C. /s/ HORRAAN /s/	DHEXAYN /s/	DAMBAYN /s/
caad/sa:d/	bacad/basad/	hillaac/hilla:s/
ceel/se:l/	bilcil/bilsil/	laac/la:s/
calool/salo:l/	bacool/baso:l/	dalac/dalas/
calan/salan/	bacayn/bacair/	duluc/dulus/
ciil/si:l/	biciid/bisid/	baac/ba:s/
col/sol/	bilcan/bilsan/	sac/sas/
ciidan/si:dan/	kacaan/kasan/	dhac/dhas/
caado/sa:do/	duco/duso/	daac/da:s/
caaro/sa:ro/	yicib/jisib/	raac/ra:s/
cayn/sayn/	dacay/dasai/	qaac/qa:s/

15. /ħ / SABEEYE DALQO CODLAWE.

Waxa codkani samaysmaan marka ay iska dhowaadaan derbiyada dalqada hoose. Middaas ayaa siisa sabaynta hawada guuxda. Seedaha sanduuqa hadalku na waa ay debecsan, oo waxa ay sabab yihiin cod laawida. Codka /ɣ / iyo /ħ / waxa ay ku kala duwan yihiin /ɣ / waxa ay leedahay cod, /ħ / na cod ma laha. /ħ / seedaha sanduuqa hadlka ayaa debecsan. /ɣ / seedaha sanduuqa hadalku ayaa giisan. Codkani waa isku dhihid meel uu ku jira ba. Waxa aad u fiirsataa dhihidda erayyadan:

SHIBBANE.

15. X	/ħ / HORRAAN /ħ /	DHEXAYN /ħ /	DAMBAYN. /ħ /
	xoolo/ħo:l/	axan/aħan/	lax/la /
	xagar/ħagar/	qaaxo/qa:ħo/	lix/li /
	xaaq/ħa:q/	leexo/le:ħo/	loox/lo: /
	xabbad/ħabbad/	laxaad/laħa:d/	libaax/liba:ħ/
	xeeb/ħe:b/	axad/aħad/	jeex/ħe:ħ/
	xidh/ħiq/	saxal/saħal/	dhex/dəħ
	xad/ħad/	baaxad/ba:ħad/	iwaax/wa:ħ/
	xaydh/ħaiq/	qaxar/ħaxar/	shax/ħaħ
	xabag/ħabag/	durraaxad/durra:ħad/	eex/ə:ħ/
	xaal/ħa:l/	suxul/suħul/	shuux/su:ħ/



Shaxanka 16d

Shaxanka 16d: Meesha uu ka unkamo / h / .

16. /h/ SABEYE BILAWGA DHUUNTA CODLAWE

Waxa codkani samaysmaa, marka ay seedaha sanduuqa hadalku ay debecsan yihiin isku na dowadaan. Codkan /R/ ee aynu harsaha nidhaahno ayaa ay si toos ah u kala gedisan yihiin. Harsuhu waxa uu samaysmaa, marka ay is qabsadaan seedaha sanduuqa hadalku. Codkani na waxa uu samaysmaa, marka ay furan yihiin. Neefta ayaa is taagta. /h/ na neefta ayaa si toos ah u soo baxda. /h/ da seedaha ayaa iyaga oo debecsan isku dhowada, taas baa na sabaynta neefta ama hawada u sabab ah. Rug kasta oo uu erayga ka dhiiisto isku si ayaa loo yiidhaahdaa sida erayyadan.

SHIBBANE


16. h /h/	HORRAAN /h/	DHEXAYN /h/	DAMBAYN /h/
hal/hal/	bohol/bohol/	sooh/so:h/	
hadh/had/	sahal/sahal/	mooh/so:d/mo:h/	
Keen/Ke:n/	dahab/dahab/	gooh/go:h/	
hiblib/hilib/	tuhun/tuhun/	taah/ta:h/	
hambo/hambo/	bahal/bahal/	shaah/fe:h/	
horor/horor/	wehel/wəhel/	daah/da:h/	
hoy/hoi/	jahaad/tfaha:d/	kaah/ka:h/	
hawd/haud/	guhaad/guha:d/	dhoh/dəh/	
hiil/hi:l/	kuhaan/kuha:n/	rah/rah/	
hawl/haul/	diihaal/di:ha:l/	bah/bah/	



SHIBBANE

4. SANKABAXIG: Waxa weeye kuwa samaysma, marka ay neeftu marto sanka. Maritaankaas ay neeftu marayso sanka awgiis ayas loogu magac daray codadkan. Waxa ay taasi na dhacdaa, marka hilibdalqaha ridhaan iyo dhanxanagga jilicsan ay neefta ka /dhan noqorka afka.

Haddii sanka la xidho na ma samaysmaan. Neeftaas sanka ka baxayaa ka sokow, waxa jira in ay meel iyo dhawaaqsameeye is qabsadaan oo labadu ba ay ka mid yihiin moqor ka afka. Waxa ku jira afkeenna laba cod. Waxa na ay yihiin /m/ iyo /n/.



Shaxanka 17d: Meesha uu ka unkamo /M/.

SANKABAXE DEBNAYN CODLE

Waxa codkani ka mid yahay labada cod ee afkoonu leeyahay ee ka baxa sanka. Waxa na uu sanaysmay marka ay labada bishmood is qabsadaan. Hawadii dabbed codkan u yeeli lahayd sanqadha ayaa sanka ka baxda. Middaas codkan ayaa oo ka iyo codka ka dambeeya ee aan sheegi doona ba, loogu magac bixiyay. Marka codkani sanaysmo waxa giisama seedaha sunduuga hadalka, oo siisa cod lahaanta. Is qabsiga ay bishmuhu is qabsanayaa waxa uu codkan kala mid yahay hakadayaasha, waxa se aqoonsi gaar ah siinaysa sankabixidda. Waxa aad isku laylidaa erayyadan:


SHIBBANE.

17. M /M/	HORRAAN /M/	DHAXAYN /M/	DAMBAYN. /M/
milic/milic/	coonnaad/co:mma:ad/	dam/dam/	
mayl/mail/	camal/camal/	khanxhan/xanxan/	
mofo/mo:fo/	cilim/ilimo/	taan/ta:m/	
maskax/maska/	timir/timir/		
muruq/muruq/	tooman/to:man/		
midig/midig/	tamar/tamar/		
mindim/mindim/	soomaali/so:pa:l/		
naanso/na:nsa/	samee/same:/		
marti/marti/	taar/taar/1/		

SHIBBANE

17.M/M/ HORRAAN /m/ DHAXAYN /m/ DAMBATN. /m/

marag/marag/	samo/samo/
maalin/ma:lin/	yimid/imid/
magac/magaʃ/	kuman/kuman/
mid/mid/	kuumi/ka:mi/



18. /n/ SANKABAXE CAARO-CIRRID CODLE.

Waxa uu samaysmaa codkani, marka ay is qabsadaan carrabka caaradiisu iyo cirridku. Hawada maqalka codkan dhalisaana, waxa ay ka baxdaan sanko, oo waxa danxanagga jilicsan awdaa moqorka afka, isaga iyo codka sare ba ee /m/. Seedaha sanduuqa hadlaku waa ay giisamaan sida codka ku lamnaan. Taas ayaa na u yeesha cod lahaanta.

Waxa codkan loogu dhawaaqa isku si meel kasta ha ku jiro.

Waxa aad dhihiddooda isku carbisaa erayyadan hoose qoran:

SHIBBANE.

n /n/	HORRAAN /n/	DHAXAYN /n/	DAMBAYN /n/
	naag/na:g/	duni/duni/	baan/ba:n/
	naxariis/naxari:s/	dhinac/dinaʒ/	kayn/kain/
	neecaw/ne:ʒau/	cunid/ʒunid/	ban/ban/
	naar/na:r/	dundumo/dundumo/	dayn/dain/
	nacayb/nacaib/	mixnad/mixnad/	suun/su:n/
	naafo/na:fo/	dubnad/dubnad/	sinnaan/sinna:n/
	nibir1/nibir1/	si	sin/sin/
	nabad/nabad/	sanbab/sanbab/	xayn/xain/
	nugul/nugul/	canab/ʒanab/	been/be:n/
	neef/ne:f/		jin/tʒin/
	nebi/nebi/		saakin/sa:kin/

5. GUDBANAYAASHA: Codadka gudban ee afkeenna ku jiraa waa mid


^{uu}
keli ah. Waxa na/samaysmaa marka ay is qabsadaan meel iyo
dhawaaqsameeye. Is qabsigaasi marka uu dhaco ayaa neeftu
qawlallada ka baxdaa, oo aanay toos u soo marin afka.

Nooftaas aan toos ugu soo baxayn awgeed ayaa codku lagu
magacaabay. Waxa ay muddaasi na tahay, ku gooni u ah
codadka qawlallada ka soo baxa.

Codka keli ah ee afkeenna ku jiraa na, waxa weeye codka

/L/. Waxa na uu samaysmaa marka ay carrabka iyo cirridka il-
kaha sare is qabsadaan. Is qabsigaas ayaa xidha neefta,
dabeeto na waxa ay ka baxdaa neeftu gawlallada. Marka codkan
lagu dhawaaqaayo, afku aad baa uu u furan yahay. Furitaankaas

ballaadhani marka uu dhaco, carrabka qofku ma buuxin karo
afku. Markaas na neeftu waxa u bannaan ee ay mari kartaa, waa
meelaha bannaan. Marka codkan samaysmayo na qawlalladi ayaa
furan.



Shaxanka 19d: Meesha uu ka unkamo /L/

19. /L/ GUDBANE CAARO - CIRRID CODLE

Codkani waxa uu samaysmaa, marka ay is qabsadaan carrabka caaradiisa iyo cirridka ilkaha sare. Marka ay sidaas dhacdo ayaa hawadu ama neeftu qawlalada ka baxdaa. Qawlalo ka bixidda hawadu ay ka baxayso qawlalada awgeed ayaa codkan laogu magac daray. /L/ waa codka keli ah ee sumaddaas yeesha. Marka uu samaysmayo codkani, waxa giisama seedaha sunduuqa hadalka, oo siiya cod lahaanta. Meel kasta ha ka fadhiisto erayga, ee isku/waxa aad u fiirsataa dhihidda erayyadan:-


SHIBBANE.

19. L /L/	HORRAAN /L/	DHAXAYN /h/	DAMBAYN /h/
	lib/liB/	bilic/biliq/	baal/ba:l/
	leeb/le:b/	tacliin/taqliin/	mayl/mail/
	laab/la:b/	tolay/toh'ai/	meel/me:l/
	lakab/lakab/	tilmaan/tilma:n/	jiil/ji:l/
	laydh/la:d/	dulmar/dulmar/	weyl/weil/
	law/lau/	duulaan/du:la:n/	fool/fo:l/
	loofar/lo:far/	hilbo/hilbo/	fandhaal/fanda:l/
	lumin/lumin/	dalab/dalab/	dabayl/dabail/
	luxud/luhud/	duleed/dule:d/	duul/du:l/
	laxni/laxni/	dulin/dulin/	xabaal/xaba:l/

WAXA LA CELCELINTU

6. GARIIRAYAASHA: Codadkani waxa weeye codadka noqnoqda, ee ay ku jirto celcelintu. Waxa cod la celcelin karaa mar ama dhawr jeer. Afkeenna na waxa ku jira cod keli ah codkaas oo ah /r/. Haddii mar gudhi ah la celceliyo, waxa aynu u qornaa mar ahaan. Haddii se dhawr jeer la celceliyo, waxa aynu qornaa laba jeer. Celcelintaas marka ama dhawrka jeer ihi na, waxa ay kala saartaa: Carab iyo carrab, waran iyo warran, garan iya garran. Codkani waxa uu samaysmaa, marka ay meel iyo dhawaaqsameeye mar ama isku dhawr jeer /su/ dhacaan, iyada oo ay neeftii weli subaynayso ama aanay is taagin. Marka codka /r/ uu samaysmayo, waxa carrabku mar ku dhacaa cirridka ilkaha sare.

Marka codku laba noqda na, waxa uu ku dhacaa cirridka dhawr jeer.



(R)

20. /r/ GARIIRE CAARO - CIRRID CODLE

Waxa uu samaysaa codkani marka ay is qabsigani carrabka caaradiisa iyo cirridka ilkaha sare isku noqnoqdo. Noqnoqdaas dhaliya garinir danan weheliyo. Noqnoqdaas awgiis ayaa na loogu magac daray codkan. Codkani waxa uu yahay codka keli ah ee noqnoqda marka la eego codadka afkeenna. Seedaha sanduuqa hadalkuuna waa ay giisamaan. Taasi na waxa ay silsaa codkan cod lahaan. Meel kasta erayga ha fadhiisto, ee isku si ayaa looga wada dhawaaqaa. Waxa aad u fiirsataa, sida uu u soo baxo codkani, marka lagu dhawaaqo erayyadan:-

SHIBBANE.

20. r /r/	HORRAAN /r/	DHAXAYN /r/	DAMBAYN /r/
	rag/rag/	arag/arag/	mar/mar/
	raag/ra:g/	waran/waran/	naar/ma:r/
	rog/rog/	waraabi/wara:bi/	dhur/dur/
	reeb/re:b/	marin/marin/	dhuur/du:r/
	ruub/ru:b/	wareen/ware:n/	kor/kor/
	run/run/	wargeys/wargeis/	koor/ko:r/
	rayn/rain/	sharikad/sharikad/	hir/hir/
	ris/ris/	shirgool/shirgo:l/	miir/mi:r/
	rash/ras/	guuraw/gu:rau/	werwer/werwer/
	riix/ri:i/	dhuray/durai/	dayr/dayr/

7. DOORSOOMAYAASHA: Codadkani waa kuwo noqon kara mar shibbane, mar na shaqal. Marka ay ugu horeeyaan iyo marka uu shaqal ka dambeeyo, waxa ay labada jeer la dhaqan noqdaan shibanayaasha. Marka ay ugu dambeeyaan erayga, waxa ay u dhaqmaan sida shaqallada. Middaas waxa aan ku garan karaa; marka ay ugu dambeeyaan magac iyo fal, waxa is bedela, haddii uu lifaaq raaco, codka ugu horeeya lifaaq:-

I. FAL

,) fal + (-taa, -tay iyo -to)

-cidaa

-ciday

-cido

II MAGAC.

,)magac lab + ka

gabay-gabayga madaw-madaw

kolay-kolayga law-lawga

hoy-hoyga woy-woyga

sii

2.sii-siisaa

dibi-dibiga

hu-huga

6. ray-raysaa

-siisay

webi-webiga

-raysay

-siiso

-rayso

3.laa-laysaa

waa-waaga

7. taw-tawdaa

-laysay

gabayaa-gabayaaga

-tawday

-layse

-tawdo

4.goo - goysaa

b) magac dhaddig + ta

- goysay

- goyso

Labadan cod ee doorsoonayaasha ah, /y/ iyo /w/, narka ay ugu danbeyaan eray Soomaali waxa shardi ah in ay ka horeeyaan shaqallada /a/ ama /o/. Horayntaasi na waxa ay ka dhigtaa labada cod ba shaqallo-lammaan ama dhafan (dhiphthongs). Markaas na waxa ka farcama shanta shaqal ee lammaan, ee afkeenu looyahay; /ai/, /ei/, /oi/, /au/ iyo /ou/. Codadka /i/ iyo /u/ ee ugu danbeyaan shantan shaqal ee lammaani, waxa ay u joogaan /y/ iyo /w/.



Shaxanka 21d: Meesha uu ka unkanoo /w/.


21. /w/ DOORSOOME DEBNAYN COOLE.

Waxa codkani sanaysnaa, marka ay is yimaadaan labada debnood, iyaga oo gooban. Neefta sanaysa ku dhawaaqiddiisa na waa ay sabaysaa. Ha se yeesho, ee waxa jira in codkan lagu magacanbo sida uu u dhaqmo marka loo fiiriyo meelaha uu ka galo erayga, ee aan loo eegin sida uu u soo baxo, sida shibanayaasha kale. Codkan iyo codka /j/ ayaa isku si u wada dhaqma marka ay erayyada ku jiraan. Saddexda rugood ee ay fadhiisan karaan, labada ugu horeeyn, waxa ay u dhaqmaan sida shibanayaasha /w/, /j/. Rugta danaynta so waxa ay u dhaqmaan sida shaqallada /u/, /i/. Is dhalan qodigaas awgiisa ayaa loogu magacaabaa doorsoonayaa. Codkani waxa uu yeeshaa cod lahaan. Waxa aad ku dhawaaqdaa erayyadan si aad u garato doorsoonidda:

.w/ ... IS ...

SHIBBANE.

21. w /w/ HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN.
waran/waran/	awood/awo:d/	
wiyil/wijil/	surwaal/surwa:l/	
weyl/weil/	jadwal/tfadwal/	
waraabe/wara:t//	horweyn/horwe:n/	
weetee/we:te:/	hawo/hawo/	
war/war/	dawaar/dawa:r/	
waan/wa:no/	diiwaan/di:wa:n/	
wi:l/wi:l/	dawo/dawo/	
weel/we:l/	caweys/cawais/	
walaal/wala:l/		
waxfar/wahtar/		
wadhaf/wadaf/		
wabax/wabah/		
webi/webi/		



Shaxanka 22d: Meesha uu ka unkaano /j/.

22. /j/ DOORSOOME HORAYN - DHANXANAG CODLE.

Codkani waxa uu samaysnaa marka ay is wabsadaan carrabka xaggiisa hore iyo dhanxanagga adag. Carrabka caaradiis waxa ay taabataa ana ku dhawaataa cirridka ilkaha sare. Seedaha sanduuqa hadalku na waa ay qiisamaan. Taasi na, sida codadka kale, waxa ay siisaa cod lahaan.

Marka uu erayga ugu danbeeyo /w/ ayaa uu doorsoona, oo shaqal isu beddelaa. Is beddelkaas uu leeyahay, ayaa na loogu bixiyay doorsoone. Marka uu ugu horeeyo iyo marka uu shaqal ka danbeeyo waxa loogu dhawaaqaa /j/, Marka uu ugu danbeeyo na /i/. Erayyadani na waxa ay kaa kaabayaan xagga kasidda dhihidda codkan:

SHIBBANE.

22. Y /J/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	yidhi/jiði/	hobyo/hobjo/	
	yuusuf/ju:suf/	iyo/ijo/	
	yinid/jinid/	niyaa/rija:/	
	yaab/ja:b/	niyi/niji/	
	yeeris/je:ris/	geyi/geji/	
	yaanbo/ja:nbo/	sayid/sajid/	
	yeel/jo:l/	siyaaro/sija:ro/	
	yeel/jo:l/	xayaab/haaja:b/	
	yicib/jicib/		
	yar/jar/		
	yaabis/ja:bis/		

8. SHIBBANAYAASHA LABANLAABMA

Af Soomaaliga waxa lee yahay shibbanayaal haddii la xoojiyo (if stressed) lammaanaada. Haddii lammaanta laga dhaafo na, eraygu aanuu macne yeelaynayn. Tusaalayaasha hoose ku qoran erayyada dhinac bixdixda xigaa dhamaan waa ay dhihid jaban yihiin, oo macne daran yihiin, kuwa midigta xigaa se dhamaan wax ay leeyihiin dhihid sugan iyo macne buuxa:

(1)

(2)

/ b/bb /	haboon /habo:n/	habboon /habba:n/
/ d/dd /	hada /hada/	hadda / hadda/
/ r/rr /	cirid / irid/	cirrid/ irrid/
/ g/gg /	toga / toga	togga /togga/
/ L/LL /	falaar / fala:r/	falaar/falla:r/
/ n/nn /	banaan/bana:n/	bannaan/bana:n/
/ n /nn /	lanaan/lana:n/	lannaan/lanna:n/

Waxa jiri karta in ay labadu ba macno yeelan karaan sida:

/ b/bb /	xabad /habad/	xabbad /habbad/
/ d/dd /	qaado/qa:do/	qaaddo/qa:ddo/
/ r/rr /	carab/ arab/	carrab/ arrab/
/ g/gg /	xagan /hagan/	xaggan/haggan/

Waxa tusaalooyinka laga dhuuxi karaa in sii jiidka dhihidda shibbanaha la sii jiidayaa ay nar na macne lee dahay nar na macne daran tahay; Jiidistaas na ay nurti lee dahay. Waxa is na laban - laabna neela qaarkood oo ku yinaad fal rogrogidda, ana qodob ku biirin, marka lahjadda falkeeda uu codka /d/ ugu danbeeyo, ana marka uu erayga nagac ah ugu danbeeyo ee qodobka "ta" lagu biiriyo:

	(1) <u>Isara</u>	(2) <u>Iyada</u>
<u>d/dd</u>	hadhay/hadai/ xidhay/xidai/ badhay/badai/	hadhay/hadai/ xidhay/xidai/ badhay/badai/
<u>q/qq</u>	gabadh/gabaq/ weedh/we:q/ naadh/na:q/	wabadha/gabadha/ qeedha/we:qqa/ naadha/na:qqa/

Labada jeer ba waxa fiican in /d/ keli ah la qoro. Sababta oo ah in uu erayga qoristiisu fool xuraanayso haddii aan codka / dh/ sunad kale lagu bedelin. Ma aragti fiicna orayyadani:

labba labba wada wada wada wada
 laba laba wada wada wada wada
 laba laba wada wada wada wada

- 1) hadhdhay /haddai/
 xidhdhay/hiddai/
 badhdhay/baddai/
- 2) gabadhdha/gabadda/
 weedhdha/wo:dda/
 naadhdha/na:dda/

Fool xunadaas waxa asturi kara iyada oo marka uu codka /d/ labanlaaban yahay iyo marka uu keli yahay ba si loo wada qoro.

Sideeddaas cod ee laban-laabna waxa soo raaca, laakiin ka dhaqan duwan oo is na laban laabana marka qoraalka caadiga ah codka /j/ oo mar na sidii shibbane u dhaqna, mar na sidii shaqal. Marka codkani laban-laabno waxa weeye marka labadiisa dhaqan is dhex galaan. Erayyada hoose ku qoran ee codkani laban - laaban yahay, marka hore waa shaqal oo shaqal baa ka horeeya, isagu na waxa uu noqday shaqal ku laamaan, marka dambe na waa shibbane oo shaqal baa ka dambeeya: Tusaale:

(1)

(2)

shay/ ai/

shayyo /{aijo/

eray/erai/

erayyo/eraijo/

gabay/gabi/

gabayyo/gabaijo/

hoy/hoi/

hoyyo/haijo/

Waxa lagu xallii karaa niddan iyada oo erayga marka /y/ ugu danbayso loo qor /i/. Haddii niddaas la qarwaaqsado aragtiddan u eeg laban-laabka ee isha qaldaya waa laga maarni karaa, Erayyadaasi kelidoodu na waxa ay u qorni kartaa sidan shai, erai, gabai, hoi. wadartoodu na waxa ay u qorni kartaa si cilni ah: shaiyo, eraiyo, gabaiyo, hoyo. Haddii se sida tusaaluhu geexayo loo dhaafna, cilni na la na dunin, aragti na na xuna. Ta keli ah ee in la aqoonsado u baahani, waxa weeye in la garawsado in marka shaqal ka horeeyo /y/ ay tahay shaqal ku lamaan shaqalkaas ka horeeyn.

9. Koobid: Tilnaamidda Shibbanayaasha.

Waxa aan halkan ku soo koobayaa sida shibbanayaasha loo tilnaamo, marka la doonayo in la qeexo noesha ay ku soo baxaan iyo sida ay u soo baxaan. Shibbanayaasha afkeennu loeyahay na waa 22 cod, waa na kuwan hoose ku qoran.

I. hakadayaasha:

- 1. /b/ hakade-labadebnood codle.
- 2. /t/ hakade caaro-cirrid codlaawe.
- 3. /d/ hakade caaro-cirrid codle.
- 4. /k/ hakade danbaysn-dhanxanagga jilicsan codlaawe.
- 5. /g/ hakade danbayn - dhanxanagga jilicsan codle.
- 6. /q/ hakade danbayn - dalqo codle
- 7. /ʁ/ hakade bilawga - dhuunta codlaawe.

II. Jaclayaasha:

- 8. /d/ Jacle caaro-cirrid codle
- 9. /tʃ/ Jacle horayn - dhanxanagga adag codle.

- III. Sabeeyayaasha: 10. /f/ sabeeye debin-iko codlaawe.
11. /s/ sabeeye caaro-cirrid codlaawe.
12. /ʃ/ sabeeye horrayn dhanxanagga adag
codlaawe
13. /x/ sabeeye lanayn - dhanxanagga
jilicsan codlaawe
14. /ç/ sabeeye dalqo collaawe.
15. /h/ sabeeye dalqo codlaawe.
16. /h/ sabeeye bilawga dhuunta codlaawe.

- IV. Sankabaxaha: 17. /n/ sankabaxe debnayn codle
18. /n/ sankabaxe caaro-cirrid codle.

- V. Gudbanayaasha: 19. /L/ gudbane caaro-cirrid codle.

- VI. Gariirayaasha: 20. /r/ gariire caaro-cirrid codle.

- VII. Doorsoonayaasha: 21. /w/ doorsoone debnayn codle.
22. /j/ doorsoone horrayn dhanxanag.codle.

	1	2	3	4	5	6	7	8
I Hakadayaasha cl cw	b		d t		g k	q		ʔ
II Jaclayaasha cl cw			d tʃ					
III Sabeeyayaasha cl cw		f	s	ʃ	x		ʒ h	h
IV. Sankabaxayaasha cl cw	n		n					
V. Gudbanayaasha cl cw			L					
VI. Gariirayaasha cl cw			r					
VII. Doorsoonayaasha cl cw	w			j				

1. Tusaaha laad: Codle (CL)

Codlaawe (CW)

1. debnaha (bilabial)

2. debnayn → Iko (labio - dental)

3. caawo-cirrid → (apico - alveolar)

4. horrayn - dhanxanagga adag (fronto - palatal)

5. danbayn - dhanxanagga jilicsan (dorso - velar)

6. danbayn - dalqo sare (dorso - uvular)
7. dalqada dhexe (pharyngeal)
8. bilawga dhuunta (glottal)

ii) SHAQALLADA

Waxa aan hore u soo sheegay in ay shaqaladu guud ahaan looyihiin laba sumadood oo ay kaga duwan yihiin shibanayaasha. Labadaas sumadood na waxa ay ahaayeen i) in aanay neeftu la kulnin wax joojiya ama cidhiidhiya, marka ay shaqalladu sanaysnayaan; ii) iyo in ay shaqalladu allanaynta u yihiin sal, ugu na nuhinsan yihiin dhihidda allanaha. Haddii aanay jirin neel iyo dhawaaqsameeye isku dhowaadaa ama is qabsadaa oo qofkii badlayaa neefsado uun, maxaa lagu kala gartaa ama ay ku kala soocnaan shaqalladu? Midda keli ah ee lagu kala garto shaqalladu, waxa ay culinada cilniga afafku ku magacaabaan nidab (color). Midabkaas waxa ay ku sharxaan: Magalka gaarka ah ee shaqal waliba gooni u nuujiyo. Magalkaas gaarka ah ama nidabka shaqalka waxa abuura carrabka oo isaga oo aan neel taaban ama ku dhowaan hore iyo dib u suluxleeya. Middaasi na waxa ay dhalinaysaan in aanay yeellan shaqalladu hoy ama doggan shaqal walba u gooni ah oo aan laba wadaagin. Shaqalladu waa ay is dhex galaan ama is hoy wadaagaan i sida nidabada jeegaanta, oo na

jiro astaan ama qoqob u dhexayn karaa laba shaqal.

Markaas waxa shaqallada lagu kala soocaa hanaanka ama habka ay u dhaqaaqaan daanka hoose, carrabka iyo debnuhu. Waxa markaas lagu kala soocaa, marka la sifaynayo shaqallada, had ba inta dhaqaaqa saddexdaas dhawaaqsameeye ku eeyahay; marka maqalka gooni u ah shaqal uu sugnaado. Middaas culinada afafku waxa ay ka gaadheen heer cilmi ah oo aan shaki iyo qalad ka iman karin. Waxa ay ku baadheen qeexidda shaqallada aalad loo sameeyay qiyaasidda herarka dhawaaqa (sound waves). shaqal waliba waxa uu markaas yeeshaa ^{meel} (area) lagu nagacaabo oo uu ka nuuqdo.

Halkaas uu shaqalku ka nuuqdo, waxa sifaynteeda qeexa

shan wax:-

- 1) daanku ~~ka~~ ba neesha uu ku eeyahay (jaw height)
- 2) carrabku neesha uu u durko.
(Tongue position)
- 3) debnuhu sida ay u ururaan.
(Lib Position)
- 4) jidka hadalku soo naraa had baqaabka uu isu dhigo
(Tension)
- 5) inta ay leeg tahay ku dhawaaqiddiisa. (duration)

Shantaas arrimood, marka ku shaqayntooda la oogo, waxa soo shaax baxa dhawr sumadood oo shaqallada kala saara.

Sumadahaas kala qeexa shaqallada ee shanta sare ka dhashaan waa sidan.

1. Daanku waxa uu dhaqdhaqaaqiisu yeelan karaa - sare , dhexe iyo hoose.
2. Caarabka dugdurgiisu waxa uu noqon karaa - hore, badhtame iyo dambe.
3. Debnuhu waa ay ururaan ama na ururaan - urursan, na urursana.
4. jidka hadalku siiba carrabku waa giigsamaa ama waa debecsanaadaa - giisan, debecsan.
5. Dhererka ku dhawaaqidda shaqalku waa dheer yahay ama waa gaaban yahay, ama waa lamaan yahay - dheer, gaaban, lamaan.

Shaqallada marka lagaga shaqeeyo habkaas aan soo sheegay waxa ay guud ahaan u kala qaybsamaan saddex qaybood oo guud:-

1. shaqallada saaxaaban:
2. shaqallada dheedheer
3. iyo shaqallada lamaan ama dhafan.

I: SHAQALLADA GAAGAABAN: Waxa u sunad guud ah shaqalladan

sida nagacood guud ka muuqata gaabaha. Dhihidda shaqallada

la na sii jiidayo, ee waa la soo gaabinayaa waxa na ay dhan

yihiin afkeenna Lix: /a/, /e/, /i/, /o/, /u/ iyo /ɔ/.

Lixdan shaqal ka ugu danbeeya waa laga maarmi karaa af-

keenna, oo laba eray oo codadka . kale iskaga mid ah

na kala saaro. Waxa se jirta, neelaha gaarkood, in shaqallada

/e/ : laba siyood loogu wada dhawaaqo , sida: wed iyo

fure /wed/ iyo /fure/ , ana wehel /wɔhel/ .

1. /i/ HOOSE HORRAYN SARE DEBECSAN OO GAABAN

Marka shaqalkan sanaysnayo carrabka in yar

baa uu hore u dhawaaqaa, labada daan na in yar

baa ay kala durkaan. Dhihiddiiso waa fududahay, waa

na shaqal gaabaan. Rugaha uu fadhiistaa waa saddex,

si baa se loogu wada dhawaaqaa.

Waxa aad isku laylidaa erayyadan:

SHIBBANE GAABAN.

1 i /i/	HORRAYN	DHECAYN	DAMBAYN
	iftiin/ifti:n/	tin/tin/	akhri/axri/
	ilno/ilno/	fin/fin/	nari/nari/
	indho/inqo/	dhib/qib/	bari/bari/
	iniin/ini:n/	dib/dib/	waqooyi/waqoiji/
	imaan/imaan/	rid/rid/	qoodi/qo:di/
	illin/illin/	hil/hil/	dhoodi/qo:di/
	irrid/irrid/	fil/fil/	geedi/ge:di/

1. i /i/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	ilko/ilko/	shil/şil/	sabti/sabti/
	ilays/ilais/	tib/ tib/	balli/balli/
	ido/ido/	bir/bir	kelli/kelli/

2. /e/ HOOSAYN HORE DHEXE DEBECSAN

Shaqalkani waxa ku lamaan yahay inta badan allanaha xoojinta leh (stress syllable). Marka la odhanayo codkan carrabku hore ayaa uu u dhaqaaqaa, daananku na si neel dhexaad ah, ayaa ay u kala qaadnaa. Codkani kobaha uu fadhiisto laba siyood ayaa loogu dhawaaqaa. Marka horraynta iyo marka dhexaynta isku si ayaa loo yidhaahdaa, /e/, marka danbaynta si fudud ayaa loogu dhawaaqa /ɔ/.

Waxa niddaas na qeexaya erayyadan:-

2. /e/	HORRAYN /e/	DHEXAYN /e/	DAMBAYN /d/
	eray/erai/	bed/hed/	qumbe/qumbd/
	edeb/edeb/	sed/sed/	tuke/tukr/
	ergo/ergo/	wed/wed/	hudhe/huqr/
	edeg/edeg/	geddi/geddi/	fure/fur/
	eber/eber/	jebi/tfebi/	dhure/cur/
	eri/eri/	denbi/denbi/	wade/wad/
	egeb/egeb/	genbi/genbi/	haye/haj/
	ekceyo/ekcejo/	kelli/kelli/	naamule/naaul/
	ehel/ehel/	hel/hel/	agaasime/aga:sin/
	degel/degel/	derbi/derbi/	xoghaye/xoghaj - /

3. /a/ HORAYN HOOSE DEBECSAN

Waxa shaqalkan sanaysnaa, marka labada daan ^{aad u} kala duragsan ^{yihid} carrabku na neeshiisa ka na dhaqaaqo. Waxa se jirta in neefta maqalkiisa keentaa, aad noodi in ay ku dhacayso carrabka xaggiisa hore. Horraynta u sunadda ah namidcaas yaa dhalisay. Rugaha codkani fadhiistaa waa saddex, oo isku si ayaa loogu wada dhawaaqaa. Waxa kale oo jirta in ku dhawaaqidda codkani ay noqon karto laba siyood. Mar uu kas soo baxo neel dhexe oo carrabka /a/, iyo mar uu ka soo baxa neel hore oo carrabka ah /a/. Labada neelood ba codkani waa dhihid sax ahi: /kan/, /kan/. Isku carbi erayyadan.

SHAQAL OO GAABAN.

3. a /a/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	aqal/aqal/	bal/bal/	qoyta/qoyta/
	amar/amar/	hal/hal/	hurda/hurda/
	abagl/aba:l/	fal/fal/	halleya/halle:ja/
	arrin/arrin/	sar/sar/	hawada/hawada/
	aroor/aro:r/	dhar/qar/	saaqa/saaqa/
	arar/arar/	nal/nal/	cunaya/ unaja/
	ashuun/ a u:n/	sal/sal/	calawala/ alaula/
	amaan/ama:n/	habar/habar/	hurdada/hurdada/
	anshax/an a /	bar/bar/	golaha/golaha/
	aqoon/aqo:n/	tan/tan	saaca/sac:ca/

4./o/ DHEXAYN DAMBE GOOBAN.

Waxa uu ka soo baxaa shaqalkani afka xaggiisa danbe, carrabku na gadaal ayaa uu u dhaqaaqaa. Labada daan na neel dhexaad ayaa ay u kala durkaan. Marka uu erayga ugu danbeeyo, marka uu ugu horreeyo iyo marka uu ugu dhexeeyo ba isku si ayaa loogu wada dhawaaqaa /o/. Waxa kale oo goobaabna debnaha marka codkan lagu dhawaaqayo.

Waxa aad dhugataa dhihidda erayyadan:-

SHAQAL GAABAN.


o. /o/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN.
	orod/orod/	indogob/dogob/	garbo/garbo/
	onkod/onkod/	bog/bog/	xoro/horo/
	obokh/obax/	hog/hog/	haro/haro/
	qosol/qosbi/	gog/gog/	dhalo/dalo/
	or/or/	fog/fog/	jirro/jirro/
	odhaah/oda:h/	sogob/sogob/	sabo/sabo/
	omos/omos/	godob/godob/	qarsho/qarfo/
	olol/olol/	xuday/hudai/	buro/buro/
	ogayn/ogain/	qod/qod/	maro/naro/
	oday/odai/	rog/rog/	heello:/he:llo/

5. /u/ SARRAYN DAMBE GIISAN OO GOOBAN. OO GAABAN.

Marka codkani sanaysanayo, carrabka dibayaa uu u
 aan
 dhaqaaqaa, daamanku na wax /i/ aqoosi lahayn ayaa ay u kala
 durkan sida shaqalka /i/. Debnuhu waa ay goobaabnaan, marka codkan
 la odhanayo. Erayga neel kasta ha kaga jiro, ee isku si
 ayaa loogu wada dhawaaqaa. Erayyada uu gadaal ka raacaa se aad
 baa yaa uga yar yihiin afkeenna. Dhihidda erayyada si fiican
 uga fiirso:

SHAQAL GAABAN.



HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
ubax/uba/	dul/dul/	bu/bu/
urux/urux/	bur/bur/	gu/gu/
unul/unul/	xul/xul/	tu/tu/
ul/ul/	muxur/muxur/	ku/kw/
udug/udug/	dhud/dud/	du/du/
ufo/ufo/	fud/fud/	isu/isu/
unexo/unexo/	shuf/shuf/	isku/isku/
ugub/ugub/	fur/fur/	lagu/lagu/
unal/unal/	hud/hud/	igu/igu/
unug/unug/	lun/lun/	nagu/nagu/



Tusaha 2d. Shaqallada Gaaban.



Hore Badhtane Danbe



Rugta carrabka ee (i) _____

Rugta carrabka ee (u) - - - - -

Rugta carrabka ee (a)

Shaxanka 23d: Shaqallada gaaban ee sare - horrayn /i/, /a/ iyo dambayn /u/.



Hore Badhtane Danbe

Sare

Dhexe

Hoose

Rugta carrabka (e) _____

Rugta carrabka (o) - - - - -

Rugta carrabka (a)

Shaxanka 24d. Shaqallada gaagaaban ee dhexe -
 horayn /e/ iyo danbayn /o/.

2. SHAQALLADA DHAADHEER:

Kuwan na waxa u sumad ah, sida nagacood ku cad, oo waa ay dhaadheer yihiin. Marka lagu dhawaaqayo shaqalladan waa la sii jiidaa oo waqti lagu qaataa ku dhawaaqiddooda. Shaqallada dhaadheer ee afkeennu waxa ay dhan yihiin shan: /a:/, /e:/, /i:/, /o:/, iyo /u:/. Waxa halkan ka muuqata in shaqalladii gaagaabnaa^{ee} shanta^{ahaa} ay ku^{biireen} laba dhibcood oo is kor saran. Labadaas dhibcood waxa ay qeexayaan dheeranta.

6. /i:/ HORAYN SARE GIILAN

Codkan waxa uu samaysnaa marka uu carrabka hore u dhawaaqo, ^{na} isaranku /aanay wax qiine/ leh kala durkin.

Seedaha meesha uu ka samaysamaan waa ay giisan yihiin. Waa cod ka dheer codka /i/.

Meelaha uu erayga kaga jiro na, isku si ayaa loogu wada dhawaaqaa /i:/ waxa aad u fiirsataa dhihidda erayyada:-

6. ii /i:/	<u>HORRAYN</u>	<u>DHEXAYN</u>	<u>DAMBAYN</u>
	iib/i:b/	jiiq/tfi:q/	kii/ki:/
	iin/i:n/	biiq/bi:q/	tii/ti:/
	iil/i:l/	miir/mi:r/	kuwii/kuwi:/
	iiga/i:ga/	miid/mi:d/	sii/si:/
	iisha/i:ʃa/	wiil/wi:l/	wii/wi:/
	iid/i:d/	kiish/ki:ʃ/	hashii/hafi:/
		wiish/wi:ʃ/	bu'dii/bu:di:/
		riix/ri:ʃ/	gugii/gugi:/
		lii/li:ʃ/	
		jiin/tfi:n/	

7. /e:/ : HORRAYN DHEXE SARE OO GIIGSAN

Waxa weeye shaqalkani shaqal dhexe oo dheer.

Dhaxayn waxa ay tahay, marka labada ^{daan} u kala durkaan

si meel dhexaad ah.

Carrabku na hore ayaa uu u dhaqaaqaa. Seedaha meeshaa uu ka samaysmaan na, waa ay gilaasaa. Rugaha codkani fadhiisto. dhammaantood isku si ayaa loogu dhawaagaa /e:/.

Waxa aad isku laylisaa dhihidda erayyadan:

7. ee /e:/	<u>HORRAYN</u>	<u>DHEXAYN</u>	<u>DAMBAYN</u>
	eebbe/e:bbɔ̃/	been/be:n/	samee/same:/
	eebo/e:bo/	keen/ke:n/	shaqee/ aqɔ:/
	eeqga/e:gga/	heer/he:r/	weynee/weyno:/
	een/e:n/	beer/be:r/	yaree/ jare:/
	eeq/e:g/	gees/ge:s/	kee/ke:/
		hees/he:s/	tee/te:/
		weel/we:l/	kuwee/kuwe:/
		geel/ge:l/	ulee/ule:/
		ceesh/ʒe:ʃ/	cashee/ʒaʃe:/
		keeb/ke:b/	gee/ge:/

8 /a:/ HORRAYN HOGSE SARE OO GIISAN

Marka codkani samaysmaya waxa hore u durka carrabka, daamanku aad ayaa ay u kala durkaan. Codkan sare ayaa loo qaadaa ama loogu dhawaaqaa. Seedaha meesha uu ka samaysmaan na waa ay giisamaan. Kobaha codkani fadhiisto dhammaantood isku si ayaa loogu wada dhawaaqa /a:/ Codka /a/ meel hoose ayaa ay ka wada samaysmaan, codkanu se waa ka dheer yahay. Waxa aad fiiro siisaayaa dhihiddood erayyadan:.

8. aa /a:/	<u>HORRAYN</u>	<u>DHEXAYN</u>	<u>DAMBAYN</u>
	aabbo/a:bbo/	taab/ta:b/	taa/ta:/
	aah/a:h/	raar/ra:r/	waa/wa:/
	aad/a:d/	haad/ha:d/	qaadaa/qa:da:/
	aar/a:r/	baar/ba:r/	taabtaa/ta:bta:/
	aan/a:n/	faar/fa:r/	saaraa/sa:ra:/
	aal/a:l/	laal/la:l/	gabayaa/gabaja:/
	aas/a:s/	gaas/ga:s/	dhurwaa/duwa:/
	aafo/a:fo/	yaal/ja:l/	taagwaa/ta:gwa:/
		waar/wa:r/	qaadannaa/qa:danna:/
			laacaa/la:ca:/

8 /a:/ HORRAYN HOCSE SARE OO GIISAN

Marka codkani samaysmaya waxa hore u durka carrabka, daamanku aad ayaa ay u kala durkaan. Codkan sare ayaa loo qaadaa ama loogu dhawaaqaa. Seedaha meesha uu ka samaysmaan na waa ay giisamaan. Kobaha codkani fadhiisto dhammaantood isku si ayaa loogu wada dhawaaqa /a:/ Codka /a/ meel hoose ayaa ay ka wada samaysmaan, codkanu se waa ka dheer yahay. Waxa aad fiiro siisaayaa dhihiddood erayyadan:.

8. aa /a:/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	aabbo/a:bbo/	taab/ta:b/	taa/ta:/
	aah/a:h/	raar/ra:r/	waa/wa:/
	aad/a:d/	haad/ha:d/	qaadaa/qa:da:/
	aar/a:r/	baar/ba:r/	taabtaa/ta:bta:/
	aan/a:n/	faar/fa:r/	saaraa/sa:ra:/
	aal/a:l/	laal/la:l/	gabayaa/gabaja:/
	aas/a:s/	gaas/ga:s/	dhurwaa/duwa:/
	aafo/a:fo/	yaal/ja:l/	taagwaa/ta:gwa:/
		waar/wa:r/	qaadannaa/qa:danna:/
			laacaa/la:ca:/

9. /o:/ DAMBAYN DHEXE GIISAN. OO GOOBAN.

Codkani waxa uu ka samaysmaa afka xaggiisa dambe. Marka uu samaysmayo, seedaha afku waa ay giisan yihiin, debnuhu na waa ay gooban yihiin. Meelaha codkani crayyada ka galo na, isku si ayaa loogu wada dhawaaqaa /o:/ . Codka /o/ meel ayaa ay ka soo wada baxaan dhexdhexaad ah, codkanu se waa ka dheer yahay. Waxa aad dhihiddooda u fiirsataa crayyadan:-

9 oo /o:/	HORRAYN	DHEXAYN	DMABAYN
	oon/o:n/	bood/bo:d/	koo/ko:/
	ood/o:d/	good/go:d/	too/to:/
	ollaa/o:lla:/	hoog/ho:g/	kuwoo/kuwo:/
	oogo/o:go/	xoog/ho:g/	soo/so:/
	oof/o:f/	roob/ro:b/	loo/lo:/
	oori/o:ri/	food/fo:d/	goo/go:/
	ooma/o:ma/	soon/so:n/	hoo/ho:/
		sooc/so:s/	noo/no:/
		soor/so:r/	goo/go:/
		gool/go:l/	kashoo/kaf:o:/


10. /u:/ DAMBAYN SARE GIISAN OO GOOBAN.

Shaqalkawu waa shaqalka ka samaysna afka xaggiisa danbe. Daamanku waxa qiimo leh ma kala dufkaan, carrabku se gadaal ayaa uu u dhaqaaqaa. Debnuhu waa ay goobaabmaan ama rogmaan, seedaha afku na waa ay giisamaan.


Marka uu erayyada ku jiro - ha ugu horeeyo, ha ugu dambeeyo ama ha ugu dhexeeyo ee, isku si ayaa loo yidhaahdaa /u:/. Marka uu ugu dambeeyo, eray sal ah ma raaco. Laakiin marka hadal (conversation) aan qoraalka ahayn, waxa uu raacaa eray kooban (contracted) oo ay '(uu)' ^{ku} jirto. ku jirto.

U fiirso erayyada khaanada saddexad.

10. uu /u:/'	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	uun/u:n/	luud/lu:d	wuu/wu:/
	uub/u:b/	luuq/lu:q/	buu/bu:/
	uusan/u:san/	shuukh/fu:ku/	kuu/ku:/
		buuq/bu:q/	muu/mu:/
		buur/bu:r/	wuxuu/wuhu:/
		guul/gu:l/	meeshuu/me:fu:/
		guusha/gu:fa/	huguu/hugu:/
		suun/su:n/	dooduu/do:du:/
		fuul/fu:l/	yuu/ju:/
		duur/du:r/	ayuu/aju:/



Tusaha 3d: Shaqallada dheer.



- Rugta carrabka ee (i:) _____
- Rugta carrabka ee (u:) - - - - -
- Rugta carrabka ee (a:) - - - - -
- Rugta carrabka ee (a).....

Shaxanka 25: Shaqallada dheer - horrayn sare /i:/ horrayn hoose

/a:/ iyo horrayn dambayn /u:/.



Sare

Dhexe

Hoose


	Hore	Badhtane	Dambe
Sare			
Dhexe	A solid line starts at the top-left, curves down to the middle, then across to the right, and finally down to the bottom-right.		
Hoose	A dashed line starts at the top-left, curves down to the middle, then across to the right, and finally down to the bottom-right.		

Rugta carrabka ee (e:) _____

Rugta carrabka ee (o:) - - - - -

Rugta carrabka ee (a)


Shaxanka 26d: Shaqallada dhexe - horrayn, iyö dambayn.



..... (i)
 (j)
 (e)

.....

Waxa kale oo shaqallada loo qaybiyaa shaqallo hore, shaqallo badhtame iyo shaqallo dambe. Shaqallada hore waxa weeye kuwa carrabku hore u dhaqaaqo, marka lagu dhawaaqayo. Shaqallada dambe na carrabka ayaa dib u noqda, marka la odhanayo. Kuwa badhtamaha na carrabku hore iyo gadaal mid na u ma durko. Waxa aad u fiirsataa shantan shaxan ee hoos ku sargo'an.




Sare
Dhexe
Hoose

	Hore	Badhtame	Dambe
Sare			
Dhexe			
Hoose			

- Rugta Carrabka i (i:) _____
- Rugta Carrabka (i) - - - - -
- Rugta Carrabka (a)

Shaxanka 27d: Shaqallada horraynta ee sare.




Rugta Carrabka (e:) -----

Rugta Carrabka (e) _____

Rugta Carrabka (a) (a)


Shaxanka 28d. Shaqallada dhexaynta ee hore.



Rugta Carrabka (a:) _____

Rugta Carrabka (a) (a)

Shaxanka 29d. Shaqallada hoosaynta hore.





Rugta Carrabka (u:) _____

Rugta Carrabka (u) - - - - -

Rugta Carrabka (a)

Shaxanka 30d: Shaqallada dambaynta ee sare.



Rugta Carrabka (o:) _____

Rugta Carrabka (o) - - - - -

Rugta Carrabka (a)

Shaxanka 31d: Shaqallada dambaynta ee dhexe.

3. SHAQALLADA LAMMAAN:

Shaqalladani waxa u tilmaan guud ah isku biiridda ay isku birrayaan laba shaqal. Labada shaqal ee isku biiray, midkood, waxa uu sal ama duluc u yahay dhihidda allanaha (syllable); ka kale na, waxa uu kala qeebtaa laba allane oo isku mid noqon lahaa. Haddii aan laba eray oo hal allene ah (monosyllabic) isy eegno, waxa aan ogaankarnaa ⁱⁿ /uu kala qeexayo ama kala saarayo macnahood. Taas na ay macnaheed tahay in shaqalkaas labaad loo baahan yahay. Tusaale ahaan waxa aad u fiirsataa labadan eray ee hal allanayaasha ah: dha /da/ codka /q/ iyo dhay /dai/ caano. Waxa ay labadaas eray ku kala duwan yihiin oo keli ah shaqalka lammaanaaday. Lammaanaanta shaqallada waxa afkeenna aabo u ah labada doorsocmo ee /w/ iyo /j/. Iyaga ayaa u kala saara shaqallada lammaanlaba kooxood oo kala ah kooxda horayneed iyo kooxda gadaaleed. Dhamman shaqallada dhafan ee afkeennu waxa weeye: /ai/, /ei/, /oi/, /au/ iyo /ou/.

11. /ai/ HORRAYSIIN HOOSE SARE

Shaqalkani waxa weeye laba shaqal oo isku biiray. Waa shaqalka erayyadaan ku jira ayn, hayn, iyo dhay. Codka /y/ marka uu erayga ugu dambeey, sidii aan hore u soo sheegay, waxa uu yeeshaa dhaqanka shaqalka /i/, oo loo ma akhri /j/ oo ah. Shibane. Dhihidda codkani waxa ay muujinaysaa sida sawirkiisa ku qeexan /ai/ in marka hore lagu dhawaaqo /a/ dabeeto na loo gudbo dhihidda /i/. Gudubkaas labada cod la iskaga gudbayaa waa mid horrayn ah.

Horrayntaas na waxa keennay shaqalka /i/ ayaa ka soo baxa afka xaggiisa hore; waxa na la wadaaga dhaqankaas shaqaladan sidiisa lamaan ee /ei/ iyo /ei/. Dhihidda erayyada u fiirso:-

SHAQAL

11. ay /ai/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
	aydin/aidin/	hayn/hain/	dhay/dai/
	aynu/ainu/	nayl/nail/	shay/shai/
	ayban/aiban/	sayn/sain/	hadhay/hadai/
	ayro/airo/	mayllin/maillin/	nabay/nabai/
	aybax/aibax/	caydhi/caydi/	wadhay/wadai/
	aynbaad/aibaid/	layli/laili/	fadhay/fadai/
	ayni/ayni/	bayd/baid/	selay/solai/
	ayfaad/aifaad/	xaydh/xaidh/	culay/culai/
	aybiin/iqiin/	cayn/cain/	ganay/ganai/
		kayn/kain/	meeray/marai/

12. /ei/ HORRAYSIIN DHEXE SARE

Shaqalkani waa shaqal lamaan oo ka kooban shaqalka dhexe ee /e/ iyo shaqalka hore ee /i/. Shaqalkan lamaan ama dhafan ee /ei/ iyo shaqal aan hore u soo sheegay ee /ai/ waxa aad moodaa dhaqan ahaan in ay legdamayaan. Middaas macnaheedu waxa ay tahay in ay rugaha ay fadhiistaan qaarkood aanay ka dhihidoon, macnaha erayga beddelaynin sida:

/axrijei/ /axrijai/. Eraygan labada siyood mid kasta oo aad u akhrido macnuhu beddelmii maayo, dhihidda na dheguhu diidi maayaan. Haddii se erayga weydii mar loo akhriyo

/weidi:/ mar na /waidi:/ , macnuhu is beddeli maayo, dhihiddu se waa jaban tahay. Marka ay taas dhacdo ayaa loo yaqaan legdanka laba cod. Marka lagu dhawaaqayo shaqalkan, marka hore waxa carrabka lagu dhuftaa shaqalka dhexe ee /e/ debeed na waxa hore loogu gudbaa shaqalka /i/. Waxa aad dhihiddooda u fiirsataa erayyadan shaqalka lammaan qeexaya:-

SHAQAL LAMMAANE AH.

12. ey /ei/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMABAYN
ey/ei/	weydii/weidi:/		holliyey/hollijei/
eyl/eil/	weydaari/woida:ri/		sadqeeyey /sadqe:jei/
	weyl/weil/		silciyey/sil ijei/
	weydiin/weidi:n/		huwiyey /huwiije/
	Weyso/weiso/		barkiyey/barkijei/
	Weyn/wein/		murdiyey/murdijei/
			jilciyey /jil ijei/
			qadiyey /qadijei/
			jebiyey /jebijei/
			fujiyey /fulijei/

13. /oi/ HORRAYSIIN DHEXE DAMBE SARE

Shaqalkan lamaan waa shaqal ka koobna /o/ iyo /i/.

Marka hore waxa carrabka lagu dhufaa /o/ oo shaqal dambe ah, dabeceto na waxa looga gudbaa /i/ sida tusaha ku qoexan.

Horrayntiisu waxa ay la mid tahay horraynta /ai/ iyo /ei/.

Meelaha uu erayga ka galo na dhammaan isku si ayaa loogu

dhawaaqaa /oi/. Erayyada uu xagga hore ka galaa se waa

yar yihiin, dhammaantood na waa ay kooban yihiin. Waxa aad

u fiirsataa dhihidda erayyadani

SHAQAL LAMAAN^{SI}

13. oy /oi/ HORRAYN

DHEXAYN

DAMBAYN

oy/oi/

hoyn/hoin/

hoy/hoi/

oydin/oidin/

qoyn/qoin/

qoy/qoi/

goyn/goin/

goy/goi/

qoyta/qoita/

dhoyla/doila/

hoyla/hoila/

14. /au/ DAMBAYSIIN HOOSE SARE

Shaqalkani waxa uu ka koobnaa shaqalka hore ee /a/ iyo shaqalka danbe ee /u/. Marka hore waxa lagu dhawaaqaa /a/, dabced na waxa looga gudhaa /u/. Gudubkaas waa mid dambayn ah sida tusaha ku qeexan - shaqalkan lammaan waxa uu la iogdamaa sida /ai/ iyo /ei/ - shaqalka /ou/ oo aan sharrifka dhano. Waxa aad u fiirsataa labadan siyood ee loogu dhawaaqo eraygan "law" /lau/ iyo /lou/. Labadan dhihiddood macnaha erayga beddoli maayaan kala dhihiddoodu na dheghuhu diidi maayaan. Laakiin eraygan *(dhan)* /dau/ /dou/ laba macne ayaa uu lee yahay, haddii laba siyood loogu dhawaaqo. Ma garanaysaa labda macne?

Waxa aad dhihiddooda dhuuxdaa erayyadan:-

SHAQAL LAMMAAN

14. aw /au/	HORRAYN	DHEXAYN	DAMBAYN
awr/aur/		gawrac/gaura /	qaw/qau/
awdal/audal/		qawlayste/qaulaistr/	daw/dau/
awd/aud/		gaws/kaus/	neocaw/ne:au/
awlax/awlax/		gawracato/gauraξato/	kolaw/kolau/
aw/au/		nawle/maul/	calaw/ alau/
awdan/audan/		mawlac/maulaξ/	jillaw/yillqu/
awfaad/awrqaad/		dawlis/daulis/	garaw/garau/
awrgaal/aurga:l/		dhawr/daur/	faraw/farau/
awbarre /awbarre / /		hawvaar/hauraar/	malaw/malau/
awlal/awlal/		qawlal/qaulal/	laxaw/lahau/

15. /ou/ DAMBAYSIIN DHEZE SARE

Shaqalkani waa shaqal la legdama shaqalka /au/.
 Erayyada uu ku jiraa na waa ay ku yar yihiin af
 Soomaaliga. Bal u fiirso dhihidda erayyadan uu
 beddeli
 shaqalkani ku jiro. Waza badidooda /oli kara shaqalka
 /au/ iyada oo aan macnaha wax ba iska beddelin.

SHAQAL LAMMAAN

15. ow /ou/ HORRAYN DHEXAYN DAMBAY

kowle/koul /	kow/kou/
	gow/gou/
	low/lou/

qabow/qabou/


nidow/nidou/

hilow/hilou/

gabow/gabou/

galow/galou/

malow/malou/



Tusaha 4d: Shaqallada lammaan - horraysiin /ai/,
/ei/, /oi/ iyo dambaysiin /au/, /ou/


4. Koobid: Tilmaamidda Shaqallada

Shaqal waliba waxa uu leeyahay tilmaan lagu sifeeyo oo ka koobanta siyaabaha uu u dhaqmo, marka uu samaysmayo. Siyaabaha lagu tilmaamaan waa shan wax ee aan ku soo sheegay bogga

Shaqallada oo mid waliba tilmaaman yahay na waa kuwan:

1. /i/ hoose horrayn sare debecsan oo gaaban.
2. /e/ hoose horrayn dhexe debecsan oo gaaban.
3. /a/ horrayn hoose debecsan oo gaaban.
4. /o/ dhexayn dambe gooban oo gaaban.
5. /u/ sarrayn dambe giisan, gooban oo gaaban.
6. /i:/ horrayn sare giisan oo dheer.
7. /e:/ horrayn dhexe sare, giisan oo dheer.
8. /a:/ horrayn hoose sare, giisan oo dheer.
9. /o:/ dambayn dhexe sare, giisan, gooban oo dheer.
10. /u:/ dambayn sare giisan, gooban oo dheer.
11. /ai/ horraysiin hoose sare oo lammaan.
12. /ei/ horraysiin dhexe sare oo lamman.
13. /oi/ horraysiin dhexe dambe oo lammaan.
14. /au/ dambaysiin hoose sare oo lammaan.
15. /ou/ dambaysiin dhexe sare oo lammaan.

Tusaha 5d: Shaqallada dhammaan.



(Tusaha 5d)

ii) C O D A D K A S A R E

Codadka taxan ka salkow, Af waliba waxa uu leeyahay codad sare.

Codadka sare waa ay ka baxsan yihiin xuruufta u dejisan afka, ay khuseeyaan, ^{ee} shibbane iyo shaqal u qaybsani. Sida ay afafka adduunku u leeyihiin xuruuf kala gudisan, ayaa ay u leeyihiin codad sare oo kala duwan. Codadka sare waxa ^{ay} ~~tiliinnaan~~ habka loogu dhawaaqayo a allanayaasha, erayyada, odhaabyada iyo weedhaha ba. Waxa dhacda, marka qofku hadlayo, in uu allanayaasha .

i) kala culaysiiyo, ama fududaysiiyo; 2) kala saraysiiyo ama kala hoosaysiiyo; 3) kala soocda ama isku dhifto; 4) toosnaado, dhaco ama kaco. Codadka caynkaas u dhaqma ee aan xuruufta ku jirin ayaa loo yaqaan codadka sare (Suprasegmental sounds).

Afafka qaarkood waxa ay leeyihiin ~~afartaa siyo~~ ee ku dhawaaqidda allanayaashu, erayyadu, odhaabyadu iyo weedhuhu ba yeelan karaan.

Sida ugu horaysa ee culaysinta iyo fududaynta qeexda, waxa aan ku magacaabayaa xoojinta (Stress). Sida labaad ee saraysiinta iyo

hoosaysiinta qeexda, waxa aan u bixinayaa kicin (nitch). Sida saddexaad

^{ee} ~~ee~~ ee ~~ee~~ ee kala soocidda iyo isku dhifashada, waxa lagu sheegi karaa qoqobaynta (Juncture). Midda ugu dambaysa ee toosnaanta, dhacidda iyo kicidda muujisa na, waxa aan la odhan karaa toonka (Tone).

Markaas codadka sare waxa ay guud ahaan u qaybsamaan afar qaybood:+

1. Xoojinta (Stress)
2. Kicinta (Pitch)
3. Toonka (tone).
4. Astamaynta (Junctures)

Qayb waliba waxa ay leeday qiyaas cilmi ah oo lagu baadho, lagu na kala sooco. Qiyaastu na waxa ay salka ku haysaa aalado hadalka baadhistiisa loo sameeyay hab ay soo saareen, laakiin cilimada afafka baadhaa ay fududeeyeen oo la baran karo, marka la dhiganayo cilmiga afafka. Qofkii cilmigaas si hufan u baartaa, waxa uu garan karaa meesha ay codadka sare hadalka ka galaan, isaga oo aan u baahin in uu aalad isticmaalo. Haddii se uu qofku u baahdo in uu si cad ugu dhaba galo, waa in uu ku shaqaynta aaladahaas bartaa ^{muddo} ~~ayd~~ aan badnayn. Qofku se marka uu leeyahay aqoon qeexidda codadka sare, waxa uu ka dhuuxi karaa hadalka qofka.

1. XOOJINTA.

Sida aan hore ba u soo sheegay, xoojintu waxa ay tahay fududaynta iyo gulanaysinta codadka (shaqallada), allanayaasha, erayyada, odhaahyada iyo weedhaha. Xoojintu waxa weeye arrin macnaha ama isticmaalka waxa la xoojiyo hedela. Haddii aanay hawshaas bedelidda ah qaban murti ma lahaateen (Significance). Xoojinta shaqalladu waxa ay bedeshaa dhismaha shaqalka. Haddii loogu dhawaaqo erayga "Fure" laba siyood. Mar la xoojiyo shaqalka dambe ee "e", waxa ay dhihidda eraygu u qormaysa /fure/ ^{dhihidda} Haddii se la fududeeyo ^{codka} codka shaqalkaas, waxa uu eraygu u qormayaa /fura/. Waxa aan halkan ka dhuuxi karnaa in shaqalkaas ugu danbeeya erayga "fure" uu u qormo, mar culus /e/ iyo mar la fududeeyo /a/. Waxa dhici karta in ay labada cod*eray keli ah, ku wada jiri karaan; sida: wehel /wehel/. Haddii loo akhriyo erayga /wehəl/, waxa la garan karaa in ay dhihiddiisu ka baxsan tahay caadi.

Sida ugu caadisan dhihid "wehel", waa sid hore /wəhel/. Waxa aynu halkan ka garan karnaa laba waxyaabood. Midda hore waxa ay tahay in eray dhihiddiisu jabayso, haddii la culaysiyo ama la fududeeyo meel ama allane aan culaysintu ama fududayntu ku habboonayn; laakiin macnaha laga dhadhansan karo, aanuu se dhammayn. Mafka sidaasidhaedo na, murti u waa ay weeqmaysaa. Waxa aynu tusaalaha ka garan karnaa in ay xoojintu murti leedahay afkeenna.

Middan sare waxa ay ahayd xoojintu marka ay muhim/tahay allanaha ama codka. Bal aynu eegno in ay murti leedahay marka ay weedhaha ku jirto xoojintu.

"Nin baa libaax dilay", meeqa macne ayaa ay leedahay, waxa qof walba oo Soomaali ihi ka warqabaa in weedhani ay laba macne yeelan karto. Macnaha hore waxa uu caddaanaysa, marka "nin" yeele yahay. Macnaha labaad na waxa uu muuqanayaa, marka "libaax" t yeele yahay. Waxa halkaas ka caddaanaysa in dhihidda weedhan macnaha hore siinaysa ay tahay mid "nin" la xoojiyay.

Nin baa libaax dilay.

Macaba dambe na dhihidda weedhu noqonayso.

Nin baa libaax dilay.

Weedha hore ninka ayaa dilay libaax

Weedha dambe na libaaxa ayaa nin dilay.

Markaas waxa aan halkan ku caddanayaqin ay xoojintu tahay wax murti weyn leh afkeenna. Waxa na aan isku deyaaya in aan si dulmar ah ugu faallood xoojinta afkeenna.

Xoojintu ku ma koob na fududaydin iyo culaysin keli ah, ee waxa labada dhexdood yimaadda laba kale. Afarta xubnood ay u qaybsantaa waa sidan:-

	Codayn <u>Qoraalka</u> (<u>Transcription</u>)	<u>Qoraal</u> (<u>Ordinary Writing</u>)
1. Xoojin Sare (Primary Stress)		
2. Xoojin Dhexe (Secondary Stress)	^	
3. Xoojin Caadi (Tertiary Stress)	\	-
4. Xoojin Hoose (Weak Stress)	✓	-

Waxa kale oo dhacda in ay afartaas xubnood ee xoojintu ay eray keli ah ku kulmaan. Eraygaas ay ku kulmaan, waa in uu ahade eray afar allane ah (Four Syllabic Word) Sida: "ta-ba-bar-ka". Marka aynu afartaas xubnood kala saarno afarta allane waxa aynu garan karnaa sida ugu caadisan, ee eraygan loogu hadalo. Hoose waxa aad ku qorayaa eraygii oo afar jeer had ba si gooni ah loogu dhawaaqay:

- | | |
|-----------------------|-----------------------|
| 1. ta - ba - bar - ka | 1. ta - ba - bar - ka |
| 2. ta - ba - bar - ka | 2. ta - ba - bar - ka |
| 3. ta - ba - bar - ka | 3. ta - ba - bar - ka |
| 4. ta - ba - bar - ka | 4. ta - ba - bar - ka |

Afartaas siyood ee loogu dhawaaqii karo erayga waxa ugu caadisan, ugu na habboon dhihid afraad ta ugu hoosaysa. Waxa aad tusaalahan ka garan kartaa in dhihidda ugu habboon erayga tababarka ay tahay marka allanaha kowaad ugu fudud yahay, allanaha, labaada ugu ku xigo, allanaha siddexaad ugu culus yahay, allanaha afraad na ku xigo culays ahaan allanaha saddexaad.

Laylis: Waxa aad dhihidooda caadiga ah baadhaa, erayyadan.

- 1. gardaro _____
- 2. Kolay _____
- 3. Gabaldhac _____
- 4. Saansaab _____
- 5. Galdogob _____

6. Waraabeeyo

7. Waaberi

8. Gurguurad

9. gaashaan dhig

10. dhaqdhaqayo

2. KICINTA:


Waxa ay kicintu tahay, sida aan soo sheegay dhihidda kala saraysiisa ama kala hoosaysiisa allanayaasha erayga, iyo erayyada, odhaahyada iyo weedhaha. Waxa ay tahay kicinta ugu saraysaa qaylad dheer ee yaabka; ta ugu hoosaysaa na waxa ay tahay xanshaha. Labada heer iyo inta u dhaxaysa ayaa hadalka sarayntiisa iyo hoosayntiisu ku eg tahay.

Culimada, afafku na waxa ay u qaybisay sidan:

	<u>CODAYN</u>	<u>QORAAL</u>
1. Kicin yaab (high)	4	-
2. Kicin sare (mid)	3	-
3. Kicin caadi (normal)	2	-
4. Kicin hoose (low)	1	-

Kicinta iyo xoojintu waa ay isa saameeyaan. Xoojinta sare iyo kicinta yaab inta badan waa ay isla jiraan. Saddexda heer ee kale na, sida labada ugu sareeyaa isula jiraan ayaa ay isu kaabaa.

Kicintu waxa weeye sumad uu leeyahay hadalku oo ah in la barto marka codaynta erayaynta iyo-weedhaynta la dersayo. Maxaa yeelay, waxa eray loogu dhawaaqi karaa: mar xanshashaq ah, mar caadi ah, mar caadi ka saraysa iyo mar yaab - naxdin, cadho iyo farxad mid kasta ha ahaad ee. Afartaas kicinood ma aha wax leh qoqob ama dayr u dhexeeya oo kala sooca, ee waxa jira in sida aad mid ugu hadlayso, aad tii kale ugu gudbayso. Kicin kasta oo ka mid ah afartaas kicinood waxa ay leedahay dhawr docood oo minankeedu leeyahay, oo ay fadhiisan karto. Marka aynu qoexayno kicin na, muhim ma aha in aynu u fiirsano ama caddayno docaha minankeeda ama hoygeeda. Waxa aad u fiirsataa: tusaalahan:-



ay "4"
Kaalay marka / tahay kaalay, waxa weeye marka erayga dhihiidda ku jirto. Kalka ay tahay "kaalay", waxa weeye, marka ay erayga dhihiidda iisu aanay caadi ahayn. "2"
Kaalay waxa ay tahay, marka erayga caadi loogu dhawaaqo. "1"
Kaalay waxa ay muujinaysaa in ku dhawaaqidda eraygu ay xanshashaq tahay.

Marka aan eego weedhaha kicintooda, waxa muuqanaya in weedh
 kasta ba erayyada ku jiraa ay kala yeelanayaa kicino kala gedisan.
 Haddii aanay taasi jirin, weedha dhidhiddeeda waxa loo maqlayaa
 sida naastaro ama rikood eajaladiisii qabsamatay oo heer kali ah ka hadalaya.
 Waxa markaas soo baxa dhawaaq aan sarayn iyo hoosayn mid na lahayn.
 Hadalkeenna na taas la mid ma aha, ee waxa uu leeyahay xirar. Kala
 duwan, Waxa aad u fiirsataa weedhan afar siyood loogu dhawaaqay.

1 3 2 3 2
 1. Ninka ayaa jooga guriga.

3 2 3 4 4
 2. Ninka ayaa jooga guriga.

2 3 1 3 2
 3. Ninka aya jooga guriga

2 1 2 3 1
 4. Ninka ayaa jooga guriga.

Haddii aad axadhid weedhaha, waxa aad garan kartaa murtida ku
 jirta kicinta. Macnaha weedhahani na waa sidan:

1. weedh adkaynaysa joogidda uu ninku
 joogo guriga. (emphatic)

2. weedh muujinaysa yaab.

3. weedh muujinaysa ku dheeldheel.

4. weedh muujinaysa fikrad caadi ah.

Waxa tusaalaha laga garan karaa in ay kicintu tahay wax giimo
 leh hadalka.

Sida tusaalaha weedhan afar siyood ugu dhawaaq, oo gray walba

kicintiisa qeex:

1. Nin baa dilay mas.
2. waxa dilay nin mas.
3. Mas ayaa dilay nin.
4. Cabdii ayaa qaadaya wargadda.
5. Hashii baa libaax cunay.

3. TOONKA:

Waxa kicinta ku loohan oo aan si cad uga baxsadayn toonka.

Afafka qaarkood ayaa waxa ay leeyihiin codad ka mid ah codadka sare

ee aan xurunfta afkaas ku jirin oo aan kicin, xoojin iyo astaamayn

mid naba ahayn, laakiin macnaha erayga dhawr macne ka dhiga.

Afka shiinuhu ama luqadda shiinuhu waxa ay leeday afar codadkaas

ka mid ah, Afkeenmu na ama luqaddeenmu na waxa ay leeday laba.

CALAAMADAHA QEEXA TOONKA:

Waxa jira in culimada afafku ay ku kala duwan yihiin calaamadaha

ay ku isticmaalaan toon qeexidda. Halkan se waxa aan ku caddaynayaa

afar x calaamadood oo aan ka soo soocay calaamadaha kala duwan ee jira.

	<u>CADAYN</u> <u>QORAAL</u>	<u>QORAL</u>
1. Toon saraysiin (high toon)		-
2. Toon hoosaysiin (Low toon)		-
3. Toon horaysiin-hoosu dhicid (fronting toon)		-
4. Toon dhambaysiin-korukicid. (Backing toon)		-

Afafka leh toonka waxa ugu caansan Af shiinaha. Afkaas waxa

uu leeyahay toon eray keli ah siin kara afar macne oo kala duwan, waxa na kala qeexa afartaas toon ee aan soo sheegay.

- Tusaale:
- /mā/ hooyo
 - /ma/ faras
 - /ma/ xarabishad
 - /ma/ quudhso

Afkeennu ma laba afartaas toonee Af Shiinuhu leeyahay. Waxa
~~Afkeennu~~ leeyahay ^{laba} keli ah: toon horaysiin iyo toon dambaysiin.
 Waxa se labada toon ku lamaan kicin korusocod (rising pitch)
 iyo kicin hoosudhiciid (falling pitch). Toonka horaysiinta had walba
 waxa la socda kicin hoosudhiciid. Toonka dambaysiinta na waxa kaaba
 kicin horukicid. Afkeenna labadaas toon oo keli ah ayaa murti leh,
 geexiddoodu ay laga ma maarmaan tahay. Waxa na ay kala soocaan
 dhisme iyo macne ba laba eray. Labadan toon waxa ay yihiin labadii
 gudida Af Soomaaliga ku sheegtay bilowgii qoridda Afkeenna shaqal
 culus iyo shaqal fudud. Toonku ma aha shaqal ee ~~waa~~ cod sare, oo sida
 xoojinta iyo kicinta u baahan calaamad ka baxsan codadka taxan.

MEELAHA TOONKA MURTI LEEYAHAY.

Meela uu toonku murti leeyahay ee Afkeennu waa ay fara badan
 yihiin. Marka ugu horaysa toonku waxa uu kala qeexaa caynka (Gender)
 afkeenna. Afafka caynka leh, waxa ka mid ah af carbeedka iyo af
 talyaaniga. Af carbeedka waxa lagu gartaa dhaddigga iyo laboodkiisa
 "ta" furan ama xidhan oo erayga dhaddig u gaar ah. Laboodku na waxa aanuu
 lahayn "ta" daas furan ama xidhan, sida: tilmiid (arday) iyo tilmiida
 (ardayad). Af talyaaniga waxa inta badan laga gartaa caynkiisa laba cod
 oo erayga gadaal kaga darsama.

Codka /o/ waxa uu gadaal kaga darsamaa erayga lab, codka /a/ na waxa
 uu ku lifaaqmaa erayga dhaddig: ragazzo (wiil) iyo ragazza (gabadh).
 Af talyaaniga dhammaan waxa dhaddigi waxa ay qaataan /a/; af carbeedka
 na dhammaan. Waxa dhaddigi waxa ay qaataan /t/ ama /h/.

Afafka caynka lihi waxa weeye kuwa magaca shay kasta dhaddig yahay ama lab yahay - shayga wax naf leh ha ahaad ama ayaa aanuu ahaanin.

Af Ingiriisku ku ma jiro afafka caynka leh. Sababtu na waxa ay tahay, waxa uu Af Ingiriisku leeyahay, wax naf leh oo dhaddig iyo labood ba leh -

Sida (actor: actress); iyo wax aan dhaddigayn labayn na oo aan yeelan karin dhaddignimo iyo laboodnimo - Sida table.

Bilaaba Af Soomaaligu yahay afafka magaca shay waliba dhaddig yahay ama lab yahay, waxa laga ma maarmaan ah in ay jirto sumad u gaar ah dhaddignimada sida af carbeed, ama laboodnimada iyo dhaddignimada sida af Talyaaniga. Haddii aanay taas jiri, waxa dhib noqonaysa sida loo garan karo isticmaalka falka.

Waraabe ayaa { qaatay }
 { qaadatay }

Lax.

Weedhan ma waxa sax ah:

Waraabe ayaa qaatay lax, ama se

Waraabe ayaa qaadatay lax.

Waxa labada weedhood la mid ah:

Dacawo ayaa qaadatay wan

Dacawo ayaa qaatay wan.

Waxa halkan ka cad in ay dhib ku tahay in uu garto qofkii
baranaya afkeenna haddii aanuu u dhalan afku. Qofka so ku soo barbaaray
waa garanayaa in ay weedha hore ku hagaasan tahay: Waraabe ayaa qaatay lax;
Weedha dambe na ay ku hagaasan tahay:
Dacawo ayaa qaadatay wan. Dhismaha kala gedisan ee falka "qaado" waxa
u sabab ah caynka labada eray ee yeelaha ah: Waraabe iyo Dacawo.

Haddii erayga yeelaha ihi ku cusub yahay qofka af Soomaaliga u dhashay,
dhibaataadaas oo kale ayaa ka hor. Inanaysa: Labadan weedhood tee baa
sax ah:

- 1. Gaat ayaa tegay shalay.
- 2. Gaat ayaa tegetay shalay.

Haddii aan ^{geranay} in ay dhib tahay afkeenna, illaa la caddeeyo
caynka magaca, garashada dhaddignimada iyo laboodnimada, Waxa aan
go'aan ku gaadhi karnaa, in ay jiraan codad sare oo muujinayn caynka
erayga magaca ah. Bal u fiirso magacyadan:

I
TOON LA'AAN

II
DAMBAYSIIN-
KORUKICID

III
HORAYSIIN-
HOOSUDKICID.

Wiyil	Wiyil	Wiyil
Geed	Geed	Geed
Shabeel	Shabeel	Shabeel
Waraabe	Waraabe	Waraabe
Dacawo	Dacawo	Dacawo
Libaax	Libaax	Libaax
Haldhaa	Haldhaa	Haldhaa
Goray	Goray	Goray
Gacan	Gacan	Gacan

Erayyada khaanadda kowaad waxa loogu dhawaaqi karaa sida Khaanadda Labaad ama Khaanadda Saddexaad. Haddii loogu dhawaaqo sida Labaad, erayyadu waa ay lab yihiin. Haddii loogu dhawaaqo sida saddexaad na erayyadu waa ay dhaddig yihiin. Waxa halkan inooga caddaanaysa in erayyada codadkood taxani isku midka yihiin ee lab ama dhaddig noqon kara uu toonku kala saaro.

Erayyada noocaas ah waxa ka mid ah kuwan:

<u>I</u> <u>ERAYGA</u>	<u>II</u> <u>LAB</u>	<u>III</u> <u>DHADDIG.</u>
Inan	Inan	Inan
Weyl	Weyl	Weyl
Nirig	Nirig	Nirig
Nayl	Nayl	Nayl
Ceesaan	Ceesaan	Ceesaan
Dameer	Dameer	Dameer
Qayl	Qayl	Qayl

Waxa kooxdan ku lamaan erayyo aan dhaddignimo iyo Laboodnimo aanay ka muuqan. Laakiin se leh dhaddig iyo labood ay keentay cayn (Gender) afkeennu leeyahay ee shay kasta oo aynu nagacaahno, ugu dhawaaqo sidii wax lab ama dhaddig. Waxa markaas afkeenna jira erayyo codadkooda taxani ay isku mid yihiin, laakiin leh laba macno oo mid wax dhaddig yahay, mid na wax lab yahay.

Erayyada dhaqankaas leh waxa ka mid ah:

<u>I</u> <u>ERAYGA</u>	<u>II</u> <u>LAB</u>	<u>III</u> <u>DHADDIG</u>
Dhiil	Dhiil	Dhiil
Dul	Dul	Dul
Suun	Suun	Suun
Beer	Beer	Beer
Gees	Gees	Gees
Buur	Buur	Buur
Mar	Mar	Mar
Fur	Fur	Fur
Hoos	Hoos	Hoos
Irmaan	Irmaan	Irmaan

Eraygu marka uu lab yahay, waxa raaca qodobka lab ee "ka".
Marka uu dhaddig yahay na, waxa raaca qodobka dhaddig ee "ta".
Dhamaan erayyada khaanadda labaad waxa raaci kara qodobka lab
ee "ka". Erayyada khaanadda saddexaad na waxa raaci kara "ta".

Waxa kale oo toonku kala qeexaa erayyada lab ee marka
wadar loo beddelo dhaddig a isu rog. Markaas haddii eray
markiis hore ba labood ahaa, marka wadar loo wbeddelo aan
qaadanin lifaaq wadareed, waxa beddelna toonkii caynka lab oo
isu beddel toon cayn dhaddig. Sida:

<u>I</u>	<u>II KAMA</u>	<u>III KAMA</u>
<u>ERAY</u>	<u>KELI</u>	<u>WADAR</u>
Awr	Awr	Awr
Baabuur	Baabuur	Baabuur
Buug	Buug	Buug
Arday	Arday	Arday
Dibi	Dibi	Dibi
Ey	Ey	Ey

labaad
 Erayyada khaanadda saddexaad waa ay lab yihiin.

Erayyada khaanadda saddexaad na waa ay dhaddig yihiin.

Waxa jira afkeenna erayyo aanuu toonku kala qeexi karin ee lagu kala caddayn karo macnahooda isticmaalka. Erayyadaas oo qayb hiddoodu waa isku mid oo la ma kala saari karo gooni ahaantooda.

Waxa ay yihiin erayyadaasi, Marka hore: 1) Erayyo dhaddig oo magac ah iyo erayyo fal amar ah oo tilmaanaya qofka labaad ee lala hadlayo wadartiisa:

<u>I</u>	<u>II</u>
<u>MAGAC DHADDIG</u>	<u>FAL AMAR</u>
Mirta	Mirta
Laaca	Laaca
Sooqa	Sooqa
Laabta	Laabta
Xoodha	Xoodha
Waabta	Waabta
Jeexa	Jeexa

MAGAC DHADDIG II

FAL AMAR II

Beerta

Beerta

Barta

Barta

Raarta

Raarta

Furta

Furta

Kol labaadka na waxa ay yihiin erayyo lab oo magac ah iyo erayyo fal amar ah oo tilmaamayo qofka lala hadlayo kelidiisa:

MAGAC

FAL

Qaad

Qaad

Mar

Mar

Feedh

Feedh

Mud

Mud

Laac

Laac

Rar

Rar

Fur

Fur

Kor

Kor

Sax

Sax

Daab

Daab.

Erayyadaas labada nooc ah isticmaalka oo keli ah ayaa laga gartaa . Sida:

1. Cali ayaa waraabiyay beerta.

fal.

Jaallayaal, beerta keesihiiin.

waxa aan ogaaday mar uu tegay.

2. Jaalle, mar jidka.

4. ASTAAMAYNTA (Junctures)

Qaybta codadka sare ugu dambaysaa waxa ay tahay kala soocid erayyada, odhaahyada iyo weedhaha afka. Sidii aan ugu horrayntii ba u sheegay. Haddii hadal yahay codad is dabajoog ah, maxaa lagu garan karaa eray, odhaah iyo weedh. Ma jiro xaraf, sida xuruuf- ama odhaahi dhammaatay ama se weedhi dhammaatay.

Culimada afafku, si ay arrintaas uga k jabo keennaan, waxa ay hadalkii is dabajooga ahaa geliyeen aalad geexda codadka. Dabeeto waxa muuqatay meel (space) hannaan oo aan cod ku dhicin, oo u dhexeeya codka erayga hore ku dhammaatay iyo codka erayga ku xigaa ka bilaamay. Marka odhaahi, ama weedhi dhammaato na, waxa ay ogaadeen codka ay odhaahda ama weedha hore ku dhammaato iyo codka ay odhaahda ama weedha dambé ka bilaabanto in ay u dhexayso dhawr meelood (Several spaces) oo kala duwani. Meelahaas bannaanaaday ayaa dabeed, Culimada afafku u samaysay calanaha ama sumado lagu kale sooco erayyada, odhaahyada iyo weedhaha.

Markii taas la ogaaday ayaa waxa kale oo dhibaato la timid, sida loo kala qeebiyo hadalka iyo qoraalka. Waxa jirta in marka qof hadlayo uu is dhexdhigo laba ama dhawr eray, taas oo ay keento degdegsiinyaha hadalku. Tusaale ahaan waxa aynu ogaanaynaa in ay labadan weedhood ee hoose ku qorani, ta hore tahay hadal, ta dambe na tahay qoraalka.

1. Kumaad doonaysaa?
2. Ku ma baa aad doonaysaa?

Tusaalahan waxa aad ka dhuuxi kartaa in, marka hadalka, ay eray keli ah isku noqdeen afar eray. Marka weedha kowaad lagu baadho aaladda codadka qeexda, waxa ay weedho ka koobmaysaa laba eray. Marka weedha labaad lagu baadho na, waxa ay weedho ka koobmaysaa shan eray. Middaas baa na keentay dhibaato iyo faraq weyn oo u dhexeeya hadalka iyo qoraalka. Hadal iyo qoraal mid kasta ha la baadho, ee waxa hubaal ah in ay jiraan meel bannaan oo erayyada, odhaahyada iyo weedhaha kala sooca oo lagu nasto marka la hadalayo. Inkasta oo ay jirto in hadalka iyo qoraalku kala astaamayn yihiin, isku hab baa loo wada baadhaa.

Astaamaha culimada afafku ku kale qeexdaa erayga, odhaahda iyo weedhaha, Marka cod iyo meel (space) loo eego waa shan:-

	QORAAL CAALAMIGA AH	QORAALKA CAADIGAH
1. Astaan xidhan		
2. Astaan furan	/ + /	
3. Astaan socod	// /	
4. Astaan korayn	// //	
5. Astaan dharmad	/ # /	

1. Astaan xidhani: Waxa ay tahay astaan la'aan. Laba cod oo isku eray ku jira meeli (space) u ma dhexayn karto. Haddii ay laba cod meel bannaani u dhexayso, labadaas cod isku eray ma noqon karaa. Markaas sidaas daraadeed ayaa aan sumad loogu yeelin!

2. Astaan furani: /+ / Waxa weeye marka ay laba cod dhexdood meeli ka bannaanaato. Waa na astaanta ugu kooban astaan ahaan marka loo weego neesha bannaan ballaadhkeeda. Astaantani waxa keli ah ee ay kala soocdaa, waa erayyada. Waa na astaanta lagu kala garto laba labadan eray:

1. /so:xi/ waa aan sooci doonaa.
/so:+xi/ sida riyaha u soc ci.

2. /kalabaid/ (tribhivomagaalo) nagaceed.

/kala + baid/ Ninka kala baydh alaabta,
waxa aad isku daydaa
tusaalooyin kale.

TUSAALA
TAPIRTAAN

3. Astaan socod: / / / astaantan iyo labada ka danbeeya waxa la isku yidhaahda astaamo go'aan. Waa astaamaha fikrad bixiya, fikraddu ha dhammaato ama ha dhinnaato ee. Astaanta socod waxa ay tilmaantaa hadal socda oo aan weli dhammaan. Waa astaanta marka qoraalka caadiga ah ay ka wakiil yihiin hakadku (,) iyo jiidinta dheeri (-) (dash).

TUSAALE:

Qoraal caadiga ah B. / barihi:/sali / waa + kan #
ah
Qoraal caadiga ah / Barihi, cali, waa kan.

4. Astaan korayn / // /. Astaantani waxa ay qoexdaa nasasho ama meel bannaan oo ka dheer astaan socodka. Waxa na ay samaysantaa, marka kicin sare ka horayso nasashada, dabeed na hakad dhaco.

Sida tirada:

kou // laba // saddex // afar #

5. Astaan dhammaad: / # / waa ay astaantani qoexdaa. I marka hadal dhammaado. Waxa na ay ka wakiil tahay astaamaha qoraalka caadiga ah ee yaabka (!), weydiinta (?) iyo joogsiga (.) .

1. XITTAANAW TOLLAZ (1) GURUGAANAJ ANMOOSEDOL

TUSAALE.

Waxa ay waxay u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caalamiga (International

1. /ma + aragta + xali H/

2. /xali / kalhor + hadalaja/ wa: + gurgu: ranajaj H/

Waxa ay waxay u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

Waxa ay gaar u yihiin hadalka lagu qoro xuruufta caadiga ah. Labadu

V . DOORSOONKA LAHAJADEED (DIALECT VARIATION I.)

Bulsho kasta afkeeda waxa ku jira kala duwanaan salka ku haysa degmooyinka ay bulshadu ka kooban tahay. Kala duwanaantaasi waa mid ka iman karta dhihidda erayyada iyo Naxwaha-dhisme ahaan, macne ahaan iyo isticmaal ahaan ba. Kala duwanaantu, oo tiro iyo tayo ba aad uga yar isku mid ahaanta afka bulshada ka dhexeeya, waxa ay ku timaadaa laba arrimood: Mid dhaqan iyo mid degmo. Tan dhaqanka waxa weeye faraqa u dhexayn kara boqor hadalkiisa iyo dhoobbi sheekadiis. Ninka dhoobbiga ihi waxa uu u kaftamay, sida uu doono; haddii uu hadal deelqaaf ah yidhaahdo waa loo dulqaataa. Boqorka ama Madaxda reerka se kaftankiisu waa in uu hufnaadaa oo hadal foolxumo reeba ka dheeraadaa. Dalalka dabaqada bulsheed aanay aad u muuqanin degmodhihidda dhaqameed cilmi ku ma fadhido, waa na la isku dhego mari karaa. Midda degmo se waxa ay keentaa isaf garanwaa.

Lahjadda degmo waxa laga dheegi karaa cilmi gaar ah oo u baahan barasho iyo fiiro dheeraad ah, haddii qof doonayo in uu af garto dhammaan bulshada ku nool degaankiisa. Lahjadda degmeed waxa ay salka ku haysaa had ba sida bushada^u warka isu gaadhsiin karto. Haddii ay degmooyinku isu faran yihiin oo aanay jirin gaadiixumo, buuro, banan iyo webiyo kala qoqobaa, waxa dhici karta in aanay dhegmodhihiddu is af garanwaa iyo is diid dhicin.

Dhegmodhihiddu ma aha wax sharci raad guurin karo.

v Dhammaan wadamada afkoodu qornaa qarniyo dhowr ah, ee luqadahooda si fiican uga shaqaynayay muddaas weli curdurka dhegmodhihideed waa haystaa. Luqadda Ingiriiska waxa looga yaqaanaa erayga daawe (frying pan) "pan", "skillet", "spider", "creeper" ama "drip-drop" degmooyin kala duwan oo dalka naraykanka ah. (Anderson & Stageberg, intro. Readings on Language, pp 319). Af Talyaaniga odhaahda "aan tagno" (-lets' go), waxa looga yaqaanaa lix odhaahood oo kala duwan lix degmo oo ka mid ah dalka talyaaniga, iyada oo ay jirto odhaah, guud /andiamo/:

- | | |
|--------------|------------------------|
| 1. /andom/ | milan |
| 2. /andam/ | emilia |
| 3. /n'amo/ | Tuscany |
| 4. /annamo | Rome |
| 5. /ia'mmi// | napla |
| 6. /gamu/ | Sicily. (Hall, intro.) |

Linguistics, pp 240)

/ Erayga priyiisle ama jegoxiir (barber) waxa isaga na gobollo kala duwan looga yaqaanaa "Salone", "salone da barba", "barbieria" iyo "barbiere". (Hall, intro. linguistics) pp. 240). Waxa ay tusaalahani muujinayaan in ay adag tahay tirtiridda degmodhihidda.

Bilaaba aan buuggan kaga falloonayo dhismaha codadka Af Soomaaliga, waxa lagama maarmaan ah in aan wax yar ka sheego dhismaha cod ahaaneed ee ku sal leh dhegmodhihidda. Haddii ay jiraan labo eray oo codka keli ah ku kala duwani, waxa dhici karata in labada cod mid sal yahay, ka kale na uu ku soo shaac baxay dhihid qalad ah. Dhihiddaas oo ku iman karta erayga maqalkiisa oo qalad galay ama carruurta oo qalad u qabsatay, dabeed na qaladkii la barbaartay, dadkii ka dambeeyay na kaga daydeen.

Hadda ba waxa aan halka isku deyayaa in aan luqad ahaan qeexo sharciyada ka dhasha is beddelkaas. Halkan hoose waxa si dulmar ah aan ku tilmaamayaa sharciyada lagu sharxi karo doorsoonka lahajadeed.

1. Shaqal Doorsoomay: Waxa weeye arrin ka dhalata is beddelka dhismeed ee uu keeno naxwuhu ama ay keento doorsoonka lahajadeed. Labada cod mid sal ah la ma sheegi karo, waa se la malayn karaa. Marka se la rabo in la kala ogaado, waxa lagu hubsan karaa, ka salka ah, marka lagu shaqeeyo codayn taariikheed (historical phonology). Hadda, waxa doorsoonkan lahajadeed khaas u yahay codayn dhismo (structural phonology). Hoose waxa ku qoran laba lahajadood tusaalahood.

(i)	1	2
	/i/	/e/
	/dibin/	/debin/
	/dibed/	/debed/
	/jilin/	/selin/
	/diɗib/	/dodib/

(ii)	/o/	/a/
	/horumar/	/harumar/
	/hore/	/hare/
	/korme:r/	/karme:r/
	/horusoɗod/	/harusoɗod/
	/hogol/	/hagol/
	/gɒbol/	/gabol/

Waxa jira qaar kale oo aad ururin karto sida /u/ dukhsi iyo /i/ dikhsi.

2. Shibbane Doorsoomay: Waa marka lahjad ahaan shibbane is beddelo, oo uu isu beddelo shibbane la dhalan ah (assimilation) ama shibbane ka dhalan ah (dissimilation). Labada cod ee kala duwaya labadan lahjadood mid sal ah buuggan ma khuseyso.

Tusaale

i) Isku dhalan ah:

labadu ba dibnaha	1 /b/	2 /m/
ayaa ay ka soo baxaan	/habradai/	/hamradai/
	/ablai/	/amlai/

ii) Kala dhalan ah

mid waa jacle	/d/	/r/
	/mid/	/mir/
mid na waa mariire	/ga:d/	/gair/
	/ba:d/	/bair/
	/bad/	/bar/
	/had/	/har/

iii) Kala dhalan ah

mid waa sabeeye	/s/	/tʃ/
	/gra:s/	/gara:tʃ/
mid na waa jacle	/xara:s/	/xaratʃ/

* iv) Kala dhalan ah /x/ /q/
 sabeye iyo habkade /waxti/ /waqti/
 /xani:s/ /qani:s/
 /dixsi/ /diqsi/

v) Kala dhalan ah /rt/ /d/
 mid waa laba cod. /na tfitro/ /na tfito/
 midna waa cod keli ah. /na karto/ /nakado/

3. Shibbane Biirray: Waxa Hirta in lahadaha qaarkood ay ku biiraan shibbanayaal erayyo ka mid ah lahad kale. Sida kuwa hore oo kale iyaga na halkan na ah in lagaga falloode ee waa mid, sidii aan hore ba u soo sheegay, u gaadh ah codaynta taariikheed. Erayyada tusaale u noqon karaa shibbane biirid

waa kuwan:

1	2
0	ʔn/ ana /d/
/da:je:r/	/da:nje:r/
/da:fa:r/	/da:fa:r/
/do:fa:r/	/do:fa:r/
/tini/	/tinid/

* Erayyadan waxa ay kaga soo biireen afkeenna xagga Af Carbeedka.

4. Laba allane oo is shibbane beddelay (metathesis)

Waa marka eray laba ama dhawr allane ihi, ay laba shibbane is jago ama meel beddelaan: Sida erayyadan:

1

/tʃiʒsin/

/dawaʒo/

/aʃsantu/

2

/tʃisʒin/

/daʒawo/

/aʃhantu/

Doorsoonka lahjadeed aad baa uu u faro badan yahay, halkan se waxa aan ku dhaafayaa afartaas aan kar ku soo sheegay.

Waxa aad adigu na isku daydaa in aad taxdo erayyada doorsoonka lahajadeed saameeyo.

1. KAABAHA: ERAYBIXINTA

Waxa hoose ku qoran erayyada teknika ah ee macnaha ay b buuggan tilmaamayaan uu cusub yahay ama adag yahay, tarjimadooda iyo macnahood.

ALLANAN (SYLLABIC)

Waxa weeye cod unka allanaha. Waxa aynqodhan karnaa shaqal allanan, marka shaqalku isugu keeno laba shibbane hal shaqal sida bad. Shaqalka /a/ waxa weeye shaqal allanan.

ALLANE IS BEDDELAY (METATHESIS)

Waa marka cod allane ku jiray u wareego allane kale sida /diqsi/ /disqi/

ALLANE IS WEYDAARTAY (REVERSING OF A SYLLABLE)

Waxa weeye marka laba allane is weydaartay degmodhihidda sida jiscin iyo jicsin.

ASTAAMAYNTA (JUNCTURE)

Waxa weeye marka firadaha hadalka la kooxeeyo, si loo kaso intii is raaci karta ba, marka dhinaca macne iyo dhisme ba laga eego.

ASTAAMAYN (JUNCTURES)

Waxa weeye magaca guud ee qormaynta ama kooxaynta codadka. Waxa na ka mid ah xoojinta (stress), kicinta (pitch), toonka (tone) iyo astaamaynta (Juncture).

ASTAAN DHAMMAAD / # / (FALLING TERMINAL JUNCTURE)

Waa astaanta mbujisa dhammaystirka dhihid weedheed.

ASTAAN SOCOD / | / (SUSTAINED TERMINAL JUNCTURE)

Waa astaanta qeexda marka ay odhaah ama weedh looga talaabayo odhaah ama weedh kale.

ASTAAN KORAYN / // / (RISING TERMINAL JUNCTURE)

Waa astaanta qeexda marka dhammaadka odhaahda ama weedha sare loo qaado sida. Weydiimaha qaar iyo yaabka.

ASTAAN XIDHAN (CLOSED JUNCTURE)

Waa astaan la'aanta u dhexaysa laba cod oo isku eray ka mid ah.

ASTAAN FURAN / + / (PLUS OR OPEN JUNCTURE)

Waa astaan kala soocda laba eray. Waa na meel bannaan ama madhan oo aan cod fadhiyin.

BADHTAMAYNTA SHAQALLADA LAMMAAN (CENTERING DIPHTHONGS).

Waxa weeye habka ay u dhacaan shaqallada lammaan ee ka danbe yahay shaqal badhtame. Shaqallada habkan u dhaca afkeennu na laha ee waxa leh afafka kale oo uu ka mid yahay af ingiriisu sida shaqalladen: /io/ea/ua/, /u/ iwm.

ISKU DHALAN AH (ASSIMILATION)

Waa marka ay is beddelaan k laba cod dhalan ahaan aad isuga dhaw, sid /k/ iyo /g/, /t/ , /d/ iyo /b/ iyo /n/.

ILKAHA SARE (UPPER TEETH)

Waxa weeye neesha uu ka sanaysmo codka /f/. Waxa isku dhowaada debinta hoose iyo ilkaha sare.

BADHTAMAHA (CENTRAL)

Waxa weeye sunadda u gaarka ah marka gudub loo eego shaqallada aan horrayn, danbayn na.

Afkeenna waa ay ka yar yihiin shaqallada noocaas ah waxa na ka mid ah /i/ iyo /e/.

BILAABIDDA (INITIATION)

Waxa weeye marka hadalku bilaabmo. Waxa na hadalku bilaaba neef sanbabada ka soo baxda.

TOON DHAMBAYSIIN - KORUKICID (BACKING TONE)

Waa dib u qaadidda carrabka, marka lagu dhawaaqayo erayyada lab.

TOON HORAYSIIN - HOOSUDHIGID (FRONTING TONE)

Waa hor u dhigidda carrabka, marka lagu dhawaaqayo erayyada lab.

TOON HOOSAYSIIN (LOW TONE)

Waa cod sare oo hoosaysiinaya erayga, aan se ku jirin codadka, taxan ee erayga (xuruufta)

TOON SARAYSIIN (HIGH TONE)

Waa cod sare oo saraysiinaya erayga, aan se ku jirin codadka, taxan ee erayga (xuruufta)

TOONKA (TONE)

Waa dhisme codad sare oo macnaha ama dhismaha erayyada isku midka tahay dhihidda codadkooda taxani kala qeexa.

JACLAYAASHA (AFFRICATES)

Waa codad shibanayaal ah oo marka ay yeesha hakad iyo qarxid. Codadkani waa hakadayaal ay ku biirtay qarxid neef xidhantay. Waxa ka mid ah /d/ iyo /tʃ/

JOOJINTA (APTICELATTU)

Waxa weeye habka cod kasta loo qeexo. Qeexidda na waxa muujiya had ba sida codka loo hakiyo ama loo dhamaystiro hawlihiis cod ee afka - meesha iyo dhawaaqsameeyaha - qabto.

JIDKA SEEDAHA (GLOTTIS)

Waa jid furma ama xidhma oo neefta hadalku soo narto. Marka uu xidhan yahay, waxa sanaysna cod hamse /R/. Marka uu furan yahay waxa sanaysna codka /h/.

XOOJIN SARE (PRIMARY STRESS) / /

Waa xoojinta ugu saraysa ee eray la saaro, marka lagu dhawaaqayo.

XOOJIN CAADI (TERTIARY STRESS) / \ /

Waa xoojinta caadiga ah ee erayga la saaro, marka lagu dhawaaqayo.

XOOJIN DHEXE (SECONDARY STRESS) / ^ /

Waa xoojin caadiga ka saraysa ee la saaro erayga, marka lagu dhawaaqayo.

XOOJIN HOOSE / / (WEAK STRESS) / ✓ /

Waa xoojinta ugu yar ee erayga la saaro, marka la odhanayo erayga.

XOOGAYSANE (ASPIRATED)

Waa cod leh sanqadh xoog ah marka uu soo baxayo, ay na la socoto neef/^{baf}tidhaahdaa.

Waxa xoogsane ah cod dhamballada horrayneed iyo dhexayneed ee hakadashaasha sida dad bad gabadh midab

XUBNAHA HADALKA (ORGANS OF SPEECH)

Waa xubnaha ka mid ah jidhka dadka ee hadalka u qaybsan ama wax ka qabta. Xubintu ha dhadhaqaado sida carrabka ama yaa aanay dhadhaqaagin sida dhanxanagga adag.

XURUUFKA CODDHIIDDA (PHONETIC ALPHABET)

Waxa ay tahay xuruufta u gaarka ah coddhiidda. Waa na sunado cod kasta oo af leeyahay logu habecyay.

DAMBE (BACK)

Waa magaca u gaarka ah shaqallada, marka lagu dhawaaqayo uu carrabku dib u durko. Waxa na ka mid ah /o/ /o:/, /u/ iyo /u:/.

DAMBAYSIINTA SHAQALLADA LAMMAAN (RETRACTING OF DIPHTHONGS)

Waxa weeye habka ay u dhacaan shaqallada lammaan ee ka dambe yahay shaqal dambe sida /au/ iyo/ou/.

DAANKA HOOSE (LOWER JAW OR MANDIBLE)

Daanka hoose waxa weeye xubinta qabata hawsha ah furitaanka iyo xidhitaan moqorka afka.

DEGMODHIHID, LAHJAD (DIALECT)

Waxa weeye kala duwanaanta codad, erayyo ama naxwe ee ku sal leh gobollada ama dabaqadda bulshadeed.

DEBECSAN (LAX)

Waa sumad ay lee yihiin shaqalladu oo kala qeexaysa shaqallada dhasha, marka ay seedaha moqorka afku debecsan yihiin. Taas oo ka soocaysa shaqallada samaysma marka ay seedaha moqorka afku giisan yihiin.

DEBINTA SARE (UPPER LIP)

Waxa weeye xubin ka mid ah xubnaha aan lalnan ee ah meelaha dhawaaq - saneeyuhu qabsado ama ku dhowaado.

DEBINTA HOOSE (LOWER LIP)

DEBINTA hoose waxa ay ka mid tahay dhawaaqsame - ayayaasha. Marka ay dhaqaado waxa ay ku dhowaataa ama qabsataa debinta sare ama ilkaha sare.

DEBNO-ILKOOLE (LABIO-DENTAL)

Waxa weeye codadka ka sakara, marka ay is qabsadaan debinta hoose iyo ilkaha sare.

DOORSOOMAYAASHA (SEMI-VOWELS)

Waxa weeye codad marka shaqal ka danbeeyo sida shibbanayaasha u dhaqna, marka shaqal ka horeeya na sida shaqallada u dhaqna.

Waxa na ka mid ah /w/ iyo /j/.

DOORSOONKA LAHJADEED (DIALECT VARIATION).

Waxa ay tahay kala duwanaanta degmodhihidda.

Waa dhihidda ay ku kala gedisan yihiin gobolladu iyo degmooyinka ama dabaqadda bulshadeed.

REEMAYAASHA (RESONATORS)

Waxa weeye magac kale oo guud oo ay leeyihiin noqorada dhuunta, afka iyo sanku.

SUMADO (CHARACTERISTICS) DEBEECADO

Waa waxyaabaha lagu garto cod, eray, ama weedh ee gooni uga qeexayo naxwe ahaan codadka, erayyada ama weedhaha kale.

SABEEYAYAAL (FRICATIVES)

Waa codadka sanaysma marka ay isku dhowadaan dhawaaqsameeye iyo neeli. Neefta ayaa marta jid xidhiidhi aha oo keenta xaqiitan sabayni weheliso. Waxa na ka mid ah codadka /f/, /s/ iyo /ʃ/.

SARE (HIGH)

Waa sumadda lagu tilmaamo shaqallada sanaysma, marka afku in yar kala qaadmo sida: /i/ /i:/, /u/, iyo /u:/.

SANBABADA (LUNGS)

Waa laba cad oo ku yaala laabta dadka iyo xoolahaba oo u qaybsan neefsashada.

(CONTINUED ON NEXT PAGE)

SANKABAXO (NASALS)

Waxa weeye codadka ka baxa noqorka sanka.
Dhawaqaqsameeyaha iyo meesha ay ka samaysnaan, waxa ay
ku yaalliin noqorka afka. Neeftu se waxa ay martaa sanka.
Waxa na ka mid ah /m/ iyo /n/.

SIIDAYN (RELEASED)

Waxa weeye sifayn ay shibbanayaashu leeyihiin.
Waa na marka cod hakaday la siidaayo. Marka ay ugu horeeyaan iyo marka ay dhexda erayga
ku jiraan waa la siidayaa.
Siidayntaasi na waxa ay keentaa xoogsanayn.

SEEDAHA QALANQULSHAHA AMA SEEDAHA SANDUUQA CODKA
(VOCAL BANDS OR VOCAL CORDS)

Waa seedo maran oo ku yaalla qalaanqulshaha guntiisa.
Marka ay debecsan yihiin, waxa samaysna cod codlaawe ah.
Marka ay giisan yihiin na, waxa samaysna cod codlo.
Seedaha dhexooda waxa ah bilawga narinka ama jidka
hawada ama hadalka.

SUMADO SARE (DIACRITICS)

Waxa weeye calaamado loogu talo galay marka cod sal
ah ay ku biirto ama ka dhimanto dabeecad (characteristic)
codadku lee yihiin.

SHAQALLADA HORE (FRONT VOWELS)

Waa shaqallada samaysna marka uu carrabku hore u dhaqaaqo. Waxa na ka mid ah : /i/, /i:/, /e/, /e:/, /a/ iyo /a:/.

SHAQALLADA DHAADHEER (LONG VOWELS)

Waa shaqallada ku dhawaaqidoodu ay qaadato waqti dheer. Waxa na ka mid ah : /i:/, /e:/, /a:/ /o:/ iyo /u:/.

SHAQALLADA BADHTAMEED (CENTRAL VOWELS)

Waa shaqallada samaysna marka uu carrabka rugtiis fadhiyo, Afkeenna na waa ay ku yar yihiin. Waxa na ka mid noqon kara: /ɔ/ iyo /a/.

SHAQALLADA GAABAN (SHORT VOWELS)

Waa shaqallada unkama marka ku dhawaaqidooda ay qaadato waqti gaaban. Waxa na ka mid ah /i/, /e/, /a/, /o/ iyo /u/.

SHAQALLADA DAMBE (BACK VOWELS)

Waa shaqallada samaysna marka carrabku gadaal u dhaqaaqo. Waxa na ka mid ah /o/, /o:/, /u/ iyo /u:/.

SHAQALLO (VOWELS)

Waxa weeye codadka aan labayn kulan meeleed iyo dhawaaqsameeye. Waxa codadka qeexidoodu ku xidhan tahay carrabka dhadhagaqiisa iyo ururka moqorka afka. Waxa na ka mid ah: /a/, /u:/ iyo /au/.

SHAQALLADA LAMMAAN AMA DHAFAN (DIPHTHONGS)

Waa kulanka laba shaqal oo mid yahay shaqal allanan (syllabic vowel) kan kale na aanuu ahayn.

Waxa ka mid ah
ay /ai/, ey /ei/ , aw /au/ iwm.

SHAQAL DOORSOOMAY (VOWEL VARIATION)

Waxa weeye marka shaqal isubeddelo shaqal kale degmodhihidda sida.

debed - dibed

debin - dibin

SHIBBANE BIIRAY (ADDITION OF A CONSONANT)

Waxa weeye marka shibbane ku biiro eray degmodhihiddiisa sida: daayeer - daanyeer
yini - yinid.

SHIBBANE (CONSONATS)

Waxa weeye codadka samaysma marka ay is qabsadaan ama isku dhowadaan dhawaaqsameeye iyo neeli. Waxa na ka mid ah hakadayaasha, sabeeyayaasha iwm.

SHIBBANE DOORSOOMAY (CONSONANT VARIATION)

Waxa weeye marka shibbane u doorsoomo shibbane kale dhagmodhihidda sida:

- har → hadh ama
- hadh → har.

DHANXANAGGA HORTIISA (FRMTO-PALATAL)

Waxa weeye codadka ka unkama, markay is qabsadaan ama isku dhowadaan carrabka xaggiisa hore iyo dhanxanaggu.

DHANXANAGGA JILICSAN -CARRABKA DABADIISA (DORSO-VELAR)

Waa codadka ka unkama marka ay carrabka xoggiisa danbe iyo dhanxanagga jilicsan is qabsadaan.

DHAWAAQSAMEEYE (ARTICULATOR)

Waa rubin lalnata ama dhaqdhaqaaqa oo ka mid ah rubnaha hadalka. Dhawaaqsameeyuhu marka uu qabsado (ama ku dhowaado) neel afka ka mid ah ayaa cod samaysmaa.

(BTAMORMOM - SMAJELHE)
Waxa ka mid ah carrabka iyo debinta hoose.

DHEXE (MID, MIDDLE)

Waa sumad lagu garto shaqallada dhasha marka labada daan kala durugooda meel dhexe joogsada, - shaqallada aan sarayn, hoosayn na. Shaqalladaas waxa ka mid ah: /e:/, /e/, /o:/, /o/ iyo /ɔ/

DHERER (LENGTH)

Waxa weeye sumad ana dabecad ay codadku yooshaan siiba shaqalladu. Afkeennu wax uu le yahay shan shaqal oo dhaadheer: /i:/, /e:/, /a:/, /o:/ iyo /u:/

GARIIRAYAAL (TRILLS)

Waa codka smaysma marka meel iyo dhawaaqsameeya dhawr jeer is qabsadaan sida codka /r/

GOOBAN (ROUNDED)

Waa dabecad ana sumad ay lee yihiin codadka qarkood.

Waa na marka ay debnuhu goobmaan, sida marka lagu dhawaaqayo /w/, /u/ iyo /o/.

GUDBANE (LATERAL)

Waa codka abuurna marka ay is qabsadaan carrabka caaradiisa iyo dhanxanaggu, dabayshu na ka baxdo qawlalada, sida /L/

CAYN (GENDER)

Waa waxa riixwe ahaan kala qeexa dhaddigga iyo laboodka.

COD (PHONE)

Waxa weeye dhawaaq gaar u soo baxa oo aan ku qaldami karin cod kale ana dhawaaq i kale. Codka marka la sii kala dhilo na waxa dhambalkii ba la yidhaahdaa cod dhambal (allophone)

CPDADKA SARE (SUPRASEGMENTAL SOUNDS)

Waa codadka aan laynka ama sadarka ku qormin ee laakiin hadalka ka mid ah sida, xoojinta, kicinta, toonka iyo astaanaynta.

CODDHILID (PHONETICS)

Waxa weeye cilmiga qeex xubnaha cod lee yahay. Cilmigaas oo cod walba u leh xaraf guud d abeed na cod walba sii kala dhilo oo calaamad ama sumad dhambalada codadka lagu kala garto.

CODSIIN (PHONATION)

Codadka afkastaba waxa ay u qabsamaan: qaar cod leh iyo qaar aan cod lahayn. Kuwa codka leh waxa la yidhaahdaa codlayaal, kuwa aan codka lahayn na waxa la yidhaahdaa codlaawyaal.

Codadka codle waxa ka mid ah /d/ /g/ /q/,
codadka codlaawe waxa ka mid ah /t/, /k/ iyo /h/.

CODLAWE (VOICLESS)

Waxa codla'aantu dhacdaa marka seedaha sanduuqa
codku ay debecsan yihiin ee jidka hadalku na faran
yahay. Waa marka aynu neefsanaymo.

CODLE (VOICED)

Waa codka sanaysna marka seedaha sanduuqa codku ay
giisan yihiin oo waxa urura seedha, markaas baa
codka guux dheeraad ah yeeshaa. Waxa na ka mid ah
/b/ /d/ iyo /g/

CARRABKA (TONGUE)

Waa xubinta cadka ah ee dhexe taalla labada
daan. Shaqallada iyo shibanayaasha hawl muhim aha
ayaa ay ka qabtaa.

CARRABKA DABADIISA (BACK OF THE TONGUE-DORSUM)

Waa carrabka xaggiisa danbe ee buuran. Waxa
na ay qarisaa cogagidda.

CARRABKA GUNTIISA (ROOT OF THE TONGUE)

Waa carrabka meesha uu ku dhamnaado ee cagagidu ku taallo.

CARRABKA HORTIISA (FRONT OF THE TONGUE)

Waa carrabka intiisa hore ee caarada ku xigta.

CAARO-ILKODLE (APICO-DENTAL)

Waa codka samaysama, marka ay is qabsadaan ama isku dhowadaan ilkaha iyo carrabka caaradiisu. Codadka sidaa u soo baxa afkeennu ma laha.

CAARADA CARRABKA (TIP OF THE TONGUE)

Waxa weeye carrabka inta hore ee dhuuban, marka la soo saaro.

CAARO-CIRRID (APICO-ALVEOLAR)

Waa codka unkama marka ay is qabsadaan ama isku dhowadaan cirridka sare iyo carrabka caaradiisu.

CIRRID (ALVEOLAR RIDGE)

Waa codka adage ee haya ilkaha sare.

QALANQULSHE (LARYNX)

Waxa weeye meesha uu ku yaallo sanduuqa hadalku.

Halkaas oo ay ku yaalliin seedaha codka siiya codlaahan ama codlaawid.

KALA DHALAN AH (DISSIMILATION)

Waa marka ay kala duwanaanta laba cod ka badan tahay isu egaantoda sid /q/ iyo /x/ ama /t/ iyo /s/.

KICIN HOOSE (LOW PITCH) //

Waa ku dhawaaqid hoose oo ku dheehan codadka taxan. Naxwe ahaan waxtar baa ay leedahay, waxa na weeye marka la xanshashaqayo.

KICIN CAADI (NORMAL PITCH) /2/

Waa ku dhawaaqidda caadiga ah ee aanay ku jirin xanshashaq, dhawaaq dheeri, iyo qaylo.

KICIN SARE (MID) /3/

Waa marka dhawaaqa sare loo qaado si bayaan lagu maqlo.

KICIN YAAB (HIGH PITCH) /4/

Waa ku dhawaaqidda yaab ee qaylo dheer muujisa.

KICIN HOOSUDHICID (FALLING PITCH)

Wax weeye marka hoose loo soo dhigayo dhihid saraysay.

KICIN KORUSOCOD (RISING PITCH)

Waa marka sare loo qaado dhihid hoosaysay.

KOFTA BISHMAHA (LIP POSITION)

Waxa weeye meelaha iyo siyaabaha dhaqdhaqaaqa
debnahennu uu ku eg yahay.

LABA -DEBNOODLE (BILABIAL)

Waxa la yidhaahdaa codadka ka unkana marka ay labada
debnood is qabsadaan, *Sida /m/*

LASIIDAYN (UNRELEASED)

Codka aan lasiidayni waa cod marka ay dhawaaqsanceeye
iyo meel is qabsadaan.

MA GOOBNA (UNROUNDED)

Waa dabeecad ay codadka qaar leeyihiin, ah na,
Marka aanay debnuhu goobaabmin ama qaloocsanin .

MA XOOGAYSANE (UNASPIRATED)

Waa cod aan lahayn sanqadh xoog ah iyo neef ^{af} tidhaahda mid na, marka uu ka soo baxo afka. Waxa ka mid ah cod dhamballada gadaaleed ee hakadayaasha sida dab ,dad .

MEEL (POINT OF ARTICULATION)

Waa meesha dhawaaqsameeyhu taabto, marka cod samaysnayo.

MOQORKA AFKA (ORAL CAVITY)

Waxa weeye rugta carrabka iyo ilkaha, waxa na ^{uu} goglan yahay inta ^u dhexaysa cagagida iyo debnaha. Waxa kale oo aynu u naqaan afka.

MOQORKA DHUUNTA (PHARYNGEAL CAVITY)

Waxa weeye jidka u dhexeeya cidhibta iyo galaanqulshaha. Waxa na ka samaysna codadka /k/, /g/ iyo /q/.

MOQORADA REENKA (RESONATING CAVITIES)

Marka ay codadku ku soo dhacaan moqorka dhuunta, moqorka afka, iyo moqorka sanka, waxa bilaabma reenka durbaanka oo kale. Waxa na ay shaandheeyaan codadka.

MOQORKA SANKA (NASAL CAVITY)

Waxa weeye marin banaan oo sankka ku q yaalla marka /m/ iyo /n/ lagu dhawaaqayo na ay neeftu ka baxdo.

MIDAB (COLOR)

Waxa uu yahay dabeecadda ama sumadda ugu muhimsan ee lagu kala sooco shaqallada. Bilaaba aanay lahayn shaqalladu rugo u gaar ah sida liidadka gumburiga ee ay is dhox gallaan sida liidadka jeegaanta.

HADAL (SPEECH)

Waxa weeye shayga keli ah ee banii-aadanku kaga duwan yahay xayawaanka keli. Waxa na hadalku qaadaa fikradaha dadka is fahamsiiya ama is fahamsiin kari waaya. Hadalku waa hawo ama neef sabaynaysa oo qabqabsanta.

HAKADAYAASHA (STOPS OR PLOSIVES)

Waxa weeye codadka samaysna marka ay dhawaaqsameeye iyo meeli is qabsadaan. Waxa na ka mid ah. Codadka /b/, /t/, /d/ /g/ iwm.

HORE (FRONT)

Waa sumad ama dabeecad. Ay shaqalladu leeyihiin oo lagu tilmaamo shaqallada carrabku hore u kaco marka la odhanayo: /i/, /i:/, /e/, /e:/, /a/ iyo /a:/.

HORAYSIINTA SHAQALLADA LAMMAAN (FRONTING OF
DIPHTHONGS)

Waxa weeye habka ay u dhacaan shaqallada lammaan ee ka dambe yahay shaqal hore. Waxa na ka mid ah: /ai/ /ei/ iyo /oi/.

HOOSE (LOW)

Waxa weeye magac guud ee lagu garto shaqallada sanaysma, marka ay labada daan aad u kala durugsan yihiin. Shaqallada noocaas ah waxa ka mid ah /a:/ iyo /a/.

HILIBDALQE (UMULA)

Waxa weeye cadka ka laalaada dhanxanagga dambe ee jilicsan. Meesha uu ku yaallaa waa ay jilicsan tahay waxa ay xidhaa noqorka sanka.

TIXRAAC (BIBIOGRAPHY)

Bugagga iyo qoraallada la tixraac marka cilni la baadhayo.

THE INTERNATIONAL PHONETIC ALPHABET

	Bi-labial	Labio-dental	Dental and Alveolar	Retroflex	Palato-alveolar	Alveolo-palatal	Palatal	Velar	Uvular	Pharyngeal	Glottal
CONSONANTS	Plosive	p b	t d	ʈ ɖ			c ɟ	k ɡ	q ɢ		ʔ
	Nasal	m	ɱ	n	ɳ		ɲ	ŋ	ɴ		
	Lateral Fricative			ɬ ɮ							
	Lateral Non-fricative			l	ɭ		ʎ				
	Rolled			r					ʀ		
	Flapped			ɾ	ɽ				ɽ		
	Fricative	ɸ β	f v	θ ð	s z	ʃ ʒ	ç ʝ		x ɣ	χ ʁ	ħ ʕ
Frictionless Consonants and Semi-vowels	w ɥ	ɸ		ɹ			j (ɥ)	(w)	ʁ		
VOWELS	Close	(y u u)					Front i y	Central i u	Back u u		
	Half-close	(e o)					e e		o o		
	Half-open	(e ɔ)					e e		ɔ ɔ		
	Open	(ɔ)							ɔ ɔ		

(Secondary articulations are shown by symbols in brackets.)

OTHER SOUNDS.—Palatalized consonants: ʃ, ʒ, etc. Velarized or pharyngealized consonants: ɰ, ɠ, ʁ, etc. Ejective consonants (plosives with simultaneous glottal stop): pʰ, tʰ, etc. Implosive voiced consonants: ɓ, ɗ, etc. Fricative trill: ʀ, ʁ (labialized ʀ, ʁ, or ʁ, ʁ). ɕ, ʝ (labialized ʃ, ʒ). ɰ, ɠ, ʁ (clicks, Zulu c, q, x). ɰ (a sound between r and l). ʁ (voiceless w). ɰ, ɠ, ʁ (lowered varieties of l, y, u). ɰ (a variety of ɰ). ɰ (a vowel between ɰ and o).

Affricates are normally represented by groups of two consonants (ts, tʃ, dʒ, etc.), but, when necessary, ligatures are used (ɰ, ʝ, ɰ, etc.), or the marks ~ or _ (ɰ or ʝ, etc.). ɰ, ʝ may occasionally be used in place of tʃ, dʒ. Aspirated plosives: pʰ, tʰ, etc.

LENGTH, STRESS, PITCH.—(full length). ˑ (half length). ˑ (stress, placed at beginning of the stressed syllable). ˑ (secondary stress). ˑ (high level pitch). ˑ (low level); ˑ (high rising); ˑ (low rising); ˑ (high falling); ˑ (low falling); ˑ (rise-fall); ˑ (fall-rise). See *Écriture phonétique internationale*, p. 9.

MODIFIERS.—nasality. ̃, breath (l = breathed l). ̣, voice (ʒ = z). ̤, slight aspiration following p, t, etc. ̥, specially close vowel (e = a very close e). ̦, specially open vowel (e = a rather open e). ̧, labialization (ɱ = labialized n). ̨, dental articulation (ʈ = dental t). ̩, palatalization (ɰ = ɰ). ̪, tongue slightly raised. ̫, tongue slightly lowered. ̬, lips more rounded. ̭, lips more spread. Central vowels ɰ (= i), ɰ (= u), ɰ (= ɰ), ɰ (= e), ɰ, ɰ, (e.g. ɰ) syllabic consonant. ̯, consonantal vowel. ̰, variety of ʃ resembling ʒ, etc.

3. KAABAHA: SHAXANADA IYO TUSAYAASHA.

Waxa halkan ku taxan wixii sawiraad ku jira buuggan -
shaxano iyo tusayaal mid walba.

(,) SHAXANADA.

- 1d (,) Neefta moqorka afka marta.
- 1d (b) Neefta s moqorka sanku marta.
- 2d (,) Marka jidka hadalku furan yahay.
- 2d (b) Marka jidka hadalku xidhan yahay.
- 3d (,) Xubnaha hadalka.
- 4d. Meesha uu ka unkamo shibbanaha /b/
- 5d. Meesha ay ka unkamaan /t/ iyo /d/
- 6d. Meesha ay ka unkamaan /k/ iyo /g/
- 7d. Meesha uu ka unkamo /q/
- 8d. Meesha uu ka unkamo /r/
- 9d. Meesha uu ka unkamo /d/
- 10d. Meesha uu ka unkamo /tʃ/
- 11d. Meesha uu ka unkamo /f/
- 12d. Meesha uu ka unkamo /s/
- 13d. Meesha uu ka unkamo /ʃ/
- 14d. Meesha uu ka unkamo /x/
- 15d. Meesha ay ka unkamaan /ħ/ iyo /ʁ/
- 16d. Meesha uu ka unkamo /h/
- 17d. Meesha uu ka unkamo /n/
- 18d. Meesha uu ka unkamo /ɲ/

- 19d. Meesha uu ka unkano / l /
- 20d. Meesha uu ka unkano /r/
- 21d. Meesha uu ka unkano /w/
- 22d. Meesha uu ka unkano /j/
- 23d. Shaqallada gaaban ee sare - horrayn sare /i/, /a/ iyo dambayn sare /u/
- 24d. Shaqallada gaaban ee dhexe - horrayn dhexe /e/ iyo dambayn dhexe /o/
- 25d. Shaqallada dheer ee sare - horrayn sare /i:/, horrayn hoose /a:/ iyo dambayn sare /u:/
- 26d. Shaqallad dheer ee dhexe - horrayn dhexe /e:/ iyo dambayn dhexe /o:/
- 27d. Shaqallada horraynta ee sare.
- 28d. Shaqallada dhexaynta ee hore
- 29d. Shaqallada hoosaynta ee hore.
- 30d. Shaqallada dambaynta ee sare.
- 31d. Shaqallada dambaynta ee dhexe.

b) TUSAYAASHA

- 1d. Shibbanayaasha.
- 2d. Shaqallada gaaban.
- 3d. Shaqallada dheer.
- 4d. Shaqallada lammaan.
- 5d. Shaqallada dhammaan.
- 6d. Xojinta.
- 7d. Kicinta.
- 8d. Toonka.

4. KAABAHA: TIRXRAACA I.

Buugagii laga qoray Af Soomaaliga.

Abraham, R.C. & Warsama, Sulaymaan:

The principles of Somali 2nd. ed.

Cyclostyled, London, 1961.

Abraham, R.C.: Somali - English Dictionary, University of London Press, London 1964.

Axmed F. Cali Idaajaa iyo Cabdulqaadir Xirsi Yanyan:

Dabkuu Shiday Darwiishkii (play)

Akaadamiyaha Dhaqanka, W.H.T.S. 1975.

Axmed F. Cali Idaajaa: Sisaaacil Mire,

Akaadamiyaha Dhaqanka, W.H.T.S, 1974.

Akaadamiyaha Dhaqanka: Kacaan,

Akaadamiyaha Dhaqanka, W.H.T.S. 1974.

Armstrong, Liliias E.: The Phonetic Structure of Somali.

Greeg Press, 1964.

Andrzejewski, B. W: Notes on the substantive pronouns in

Somali. School of oriental and African studies,

University of Londond, 1961.

ANDRZEJEWSKI, B.W.: The Declension of Somali Nouns.

The school of oriental and African studies,

University of Londond, 1964.

- Andrzejewski. B.W. : Inflectional Characteristics of the
so-called "weak verbs" in Somali,
School of oriental and African studies,
University of London, 1968.
- Barry, B.: An Elementary Somali Grammar, Asmara (Ethiopia),
Tipografia Raimondi, 1937.
- Bell, C.R.V.: The Somali Language, Longmans, Green & Co.
London, 1953.
- Bruno Panza: Af Soomaali , La Monnier - Firenze, 1974.
- Xafiiska Manaahijta: Sugaan - Dugsiga Sare, Warsaaradda
Waxbarasha iyo Barbaarinta, 1976.
- Dahabo Faarax iyo Raaqiya Xaaji Ducaale: Hooyada iyo hawlaheeda,
Akaadaniyaha Dhaqanka, W.H.T.S, 1973.
- Drysdale, John, G.S.: Somali Primer, Part I & II. The
Stationery Office Hargeysa, Somalia, 1959.
- Drysdale, John G.S.: Notes of the Somali Language for beginners.
Stationery Of Office Hargeysa Somalia,
1953.
- Shire Jaamac Axmed: Naxwaha Af Soomaaliga, Akaadaniyaha
Dhaqanka, W.H.T.S. 1976.
- Shire Jaamac Axmed: Rooxaan, Akaadaniyaha Dhaqanka, W.H.T.S.,
1973.
- Shire Jaamac Axmed: Halganka Noloshu, Akaadaniyaha Dhaqanka,
W.H.T.S., 1973.

Cabdulqaadir Faarax Bootaan: Murti iyo Sheekooyin.

Akaadaniyaha Dhaqanka W.H.T.S., 1973.

Cabdi Maxamuud Caanir: Geediga Wadeay, Akaadaniyaha

Dhaqanka W.H.T.S., 1973.

Galaal, Muuse X. J & Andrzejewski, B.W. : Xiknad Soomaali.

The school of oriental and African studies,

University of London, 1956.

Guddiga Af-Soomaaliga: Asaaska Naawaha Af Soomaaliga.

Akaadaniyaha Dhaqanka, W.H.T.S., 1973.

G/Le Faarax M. J. Cawil: Aqood Darro waa u nacab Jacayl:

Akaadaniyaha Dhaqanka W.H.T.S., 1974.

KIRK, G.W.C.: A Grammar of the Somali Language with

examples in prose and verse of different

Somali Dialects. Cambridge University

Press, London 1905.

Maxamuud Caalin Muur (Tarjinad): Kacoo Dalka Beerta.

Akaadaniyaha Dhaqanka, W.H.T.S., 1972.

Muuse Cumar Islaan: Sheekooyin Soomaaliyeed, Akaadaniyaha

Dhaqanka W.H.T.S., 1973.

5. KAABAHA: TIRAACA II

Buugag ay wax ka tilmaamaya dhismaha codadka (codaynta)

Aurbach/Cook

Kaplan/Tufte

Transformational Grammar: a guide for
Teachers. English Language Services
Inc. Rockville, Maryland 1968.

Anderson & Stageberg : Introductory Readings on Language,
Holt, Rinehart and Winston Inc. New York
1965.

Dinneen, Francis P. : An Introduction to General
Linguistics, Holt, Rinehart and Winston, Inc.
1967.

Francis, W.Nelson: The structure of the American English,
The Poland Press Company, New York 1958.

Hall Jr., Robert A.: Introductory Linguistics, Chilton
Books. New York 1967.

Hill, Archibald A. Linguistic Structures: From Sound to
Sentence in English, Harcourt, Brace &
World, Inc. 1958.

Lado & Fries.: English Pronunciation: Exercises in Sound
Segments, intonation and Rhythem, University
of Michigan Press, Ann Arbor 1960.

- Langacker, Ronald W., Language and its structure: Some
Fundamental Linguistic concepts, Harcourt,
Brace & World, Inc. New York 1968.
- Pel, Mario.: The glossary of linguistic terminology, Anchor
Books, Doubleday & Company, Inc. Garden city,
New York, 1966.
- Prator Jr., Glifford H. : Manual of American English Pronunciati-
ion Re-ed, Holt, Rinehart and Winston, Inc.
New York. 1957.
- Eyles/Algeo.: English: An introduction to language, harcourt,
Brace & World, Inc. New York 1970.
- Roberts, Paul.: English sentences, Harcourt, Brace & World,
Inc. 1962.
- Stageberg, Norman C.: An introductory English Grammar, Holt,
Rinehart and Winston, Inc. New York, 1967.
- Sturtevant, E.H.: Linguistic change: An introduction to the
historical study of language, Phoenix Books,
The University of Chicago Press, Chicago 1965.